MAJALADDA
MARAG

Cadadka Lixaad | Sep 2025

# PUNTLAND: MURUQII IYO MAALKII OO KA TAGAYA



Siciid Axmed Cali

Bogga: 7

Xigashada Sawirka: Facebook


# Qorayaasha Majaladda



**Faarax Cismaan**

Madaxweyne Deni: "Puntland waa barwaaqo" – Falanqeyn iyo xaqiiqo

5



**Siciid Axmed Cali**

Puntland: Muruqii iyo Maalkii oo Ka Tagaya

7



**Bashiir Suuleey**

Sidee u Kala Saarista Sayniska iyo Aartiska u Saamaysaa Ardayda Dugsiyada Sare ee Puntland?

10



**Axmed Siciid Nuur**

Soomaaliya: Maxay siyaasadu u saldhigan weyday, xagee iska qaban la'dahay?

13



**Cabdiraxmaan Shiikhdoon**

CAQABADAHA KU GEDAAMAN WAXBARASHADA AASAASIGA AH EE PUNTLAND IYO SIYAAABAHA LOO XALIN KARO

17



**Dr. Maxamed Cali Faarax**

Dowladda iyo Bulshada: Mas'uuliyad Wadaag iyo Milicsi Qaran

21



**Dr. Cabdiqadir M Takar**

Aragtida Islaamka ee Siyaasadda


23



**Fawsiyo Cabdullahi Cilmi**

Saamaynta Taban ee Isticmaalka Shabakadaha Bulshada ku Leeyihiin Guusha Waxbarashada Ardayda

27



**Dr. Cabdulxamiid Sh. Ibraahim**

Dib-u-dhiskii Nidaamka Caafimaadka Soomaaliya: Xaaladda Hadda, Caqabadaha, Fursadaha, iyo Mudnaanta Siyaasadeed

31



**Dr. Cabdifatax Ashkir**

Isbeddellada juquraafi- siyaasadeed ee gobolka iyo saamaynteeda Soomaaliya!

35

# Dhambaalka Tifaftiraha

Waxaa farxad iyo bogaadin noo ah in aan soo saarno daabacaadda lixaad ee Majalladda Marag, oo ah madal warbaahineed aan ugu talaggalnay in lagu daabaco macluumaad kala duwan sida warbixino, falanqayno, iyo aragtiyo ay diyaariyeen dad kala duwan oo ka tirsan bulshada, sida cilmi-baarayaal, suxufiyiin, aqoonyahano, hal-abuurro, iyo dadka kale oo khibrad iyo aqoon u leh dhinacyada kala duwan ee taabanaya nolosha bulshadeena.

Majalladda Marag, oo la qorsheeyay in la daabaco hal mar bishii, waxaa aasaasay xarumaha ku midaysan Iskaashiga Xarumaha Warbaahinta Soomaaliyeed (Somali Newsrooms Coalition – SNC). Iskaashigan wuxuu ka kooban yahay xarumo kala duwan, kuwaas oo kala ah: Milgo Media, Puntland Mirror, The Daily Somalia, Dookh Press, iyo Gaashaan Dialogue.

Ujeeddada majalladdan waa in la helo madal ka duwan warbaahinta caadiga ah ee dalka ka jirta, kuwaas oo inta badan xoogga saara soo tebinta dhacdooyinka maalinlaha ah. Majalladdan waxay hiigsaneysaa inay bulshada u gudbiso macluumaad dhigaal noqda, waxtar leh oo kor u qaada wacyiga iyo fahamka bulshada, kobciya doodaha iyo aragtiyaha caafimaadka qaba, soo bandhiga dhaliilo wax dhisaya oo daahfuran, islamarkaana dhiirrigeliya bulshada gaar ahaan dhallinyarada, si ay u noqdaan kuwo xog ogaal ah, si buuxda u fahma xaaladda dhabta ah, una gaari karaan go’aammo sax ah oo noloshooda iyo bulshada wax ku ool u ah.

Majaladdan waxay ka madax-bannaan tahay aragtiyaha siyaasadeed ee kala duwan ee dalka ka jira, waxayna u furan tahay qof walba oo doonaya in uu la wadaago bulshada fikrado, warbixino, iyo falanqeyn ku saleysan aqoon iyo waayo-aragnimo.

Cadadkan waxa uu ka koobanyahay mowduucyo kala duwan oo diiradda saaraya siyaasadda, tiknoolajiyada iyo arrimaha bulshada sida waxbarashada iyo caafimaadka, kuwaas oo ay qoreen khubaro aqoon iyo waayo-aragnimo ballaaran u leh qaybahan.

**Cabdi Cumar Bile**
Tifatiraha Guud

# MADAXWEYNE DENI: "PUNTLAND WAA BARWAAQO"

## FALANQEYN IYO XAQIIQO



Faarax Cusmaan



Xigashada Sawirka: Puntland State House

"Puntland waa barwaaqo, nimco ay taallo, meelkastana looga soo shaqo tago", waa hadal uu Madaxweyne Siciid Cabdullaahi Deni ka jeediyay xafladdii lagu soo xirayay tababar boolis cusub. Faalladan kooban waxaan ku eegayaa: hadalka madaxweynuhu ma leeyahay saldhig xaqiiqo ah mise waa gole-kafuul aan xaqiiqo ku salaysnayn?

Barwaaqada ummadeed ama waddan ma ahan oraah la iska yiraahdo; waa arrin caalami ah oo leh halbeegyo oo tusayaal cilmiyeed lagu cabbiro. Halbeegyadan ayaa ah tubaha lagu saleeyo hiigsiyada horumarineed. Sidaas darteed, aan dul istaago afar qodob oo muhiim u ah tusmada barwaaqo, anigoo mid kasta ku eegaya xaqiiqdiisa gudaha Puntland.

## 1. HALBEEGGA DHAQAALE

Halbeegga ugu horreeya ee lagu cabbiro barwaaqada waa dhaqaalaha: wadarta wax-soosaarka gudaha (GDP), heerka shaqo-abuurka, maalgashiga gudaha iyo dibadda, sicir-bararka, iyo heerka saboolnimada bulshada. Qodobadan ayaa lagu saleeyaa daraasado cilmiyeed iyo tirooyin rasmi ah oo lagu cabbiro horumarka dhaqaale ee dal.

Warbixintii ugu dambaysay ee Hay'adda Tirakoobka Puntland (2022) waxay muujisay in wadarta wax-soosaarka gudaha uu gaaray USD 2.7 bilyan, kobac dhan 10.7% ah marka la eego qiimaha suuqa. Si kastaba, marka sicir-bararka laga saaro, koboca dhabta ahi wuxuu ahaa 1.3%, taas oo inta badan ka dhalatay kororka qiimaha halkii uu ka iman lahaa kordhinta wax-soo-saar kordhay. Isla warbixintaasi waxay tilmaamaysaa in heerka shaqo la'aanta dhallinyarada tahay 28.4%, halka sicir-bararku uu noqday –0.21%, taasoo ka tarjumaysa hoos u dhaca celceliska qiimaha badeecadaha la soo dejiyo, iyadoo dhaqaaluhu ku salaysanyahay doolarka, maadaama aysan jirin lacag maxalli ah oo jaangoysa sicirka.

Dhanka saboolnimada, inkastoo aan la hayn tiro rasmi ah oo cusub, haddana warbixinno bini'aadamnimo ayaa ku qiyaasay in ilaa 60% bulshada Puntland ay ku nool yihiin saboolnimo. Sidoo kale, xog rasmi ah oo ku saabsan heerka maalgashiga gudaha iyo dibadda lama hayo, si kastaba, marka guud loo eego, ma muuqdaan maalgelinno waaweyn marka laga reebo warshado yaryar, dekedda Garacad oo aan weli si buuxda u shaqo-gelin, iyo tiro kooban oo ganacsiyo heer dhexe ah.

Inkastoo xogtan rasmiga ahi ka timid saddex sano ka hor, haddana marka la isku daro wax-soosaarka, shaqo-abuurka, sicir-bararka, saboolnimada, iyo maalgashiga, lana indha-indheeyo xaaladda Puntland ee maanta, waxaa muuqata cakirnaan dhaqaale oo aad uga fog in lagu tilmaamo barwaaqo.

## 2. HALBEEGGA BULSHADA

Si loo qiimeeyo heerka barwaaqo ee ummad leedahay, waxaa sidoo kale lagama maarmaan ah in la eego heerka adeegyada bulshada, gaar ahaan caafimaadka, waxbarashada iyo heer nololeedka bulshada. Marka xaaladda Puntland loo dhabbagalo, adeegyada caafimaadka ee aasaasiga iyo kuwa heerka sareba aad bay u hooseeyaan. Ma jiro cisbitaal si buuxda u daboola ama bixin kara adeeg caafimaad oo tayo leh, xanuunnada faafa sida Malaariyada iyo Gawracatada waayadan dambe si weyn ayaa looga qeylo-dhaaminayaa. Adeegyada caafimaadka aasaasiga ahna waxay wajahayaan xaalad adag maadaama ay si weyn ugu tiirsanaayeen kaalmo hay'adeed. Tusaale, daraasad uu 2024-kii daabacay machadka SIDRA ayaa lagu ogaaday in muddo 30 maalmood gudahood magaalada Garoowe xog ay ka uruuriyeen 106 qof oo u safray dibadda si ay u helaan daryeel caafimaad, ay muujisay in cabashooyinka ugu waaweyn ee dadka caafimaadku raadsaday ay ahaayen xanuunnada lafaha iyo murqaha (17%), cudurrada kaadi-mareenka (16%), xanuunnada neerfaha (13%), cudurrada kansarka (8%) iyo dhibaatooyinka dheefshiidka (8%), iyadoo 18 ka mid ah dadka la wareystay ay sheegeen inay daryeel caafimaad u raadsadeen cudurro badan oo isku mar ah. Daraasadda SIDRA ayaa tilmaamtay in celceliska kharashka caafimaad ee dibadda loogu safro uu ahaa $8,543 doolar, iyadoo kharashka ugu sarreeya uu gaaray illaa $ 30,000 doolar, halka kharashyada daryeelka caafimaad qaarkoodna ay kor u dhaafeen $ 40,000 doolar, taasoo ku xiran muddada uu qofku halkaas joogo iyo nooca daryeel caafimaad ama qalliin ee loo baahan yahay.

Si guud, dayac baaxad leh ayaa ka muuqda heerarka kala duwan ee adeegyada caafimaadka Puntland, taas oo sababtay in dad badan ay adeeg caafimaad u raadsadaan meel ka baxsan deegaanadooda.

Hannaanka waxbarashada Puntland arday noocee ah ayuu soo saaraa? Su'aashan si qeexan oo cilmiyeysan loogama jawaabi karo, maadaama aysan hirgelin siyaasad waxbarasho oo aan qeexin nooca arday ee lasoo saarayo. Dhanka kale, sida ku cad warbixinada waxbarashada Puntland, heerka diiwaangelinta waxbarashada aasaasiga ah waa

kaliya 33%, halka dugsi sare uu yahay 13.9%. Dhanka kale, heerka akhris-qoraal ee bulshada Puntland ayaa lagu qiyaasay 51.2%. Inkastoo tiradani aysan ka hooseyn celceliska guud ee Soomaaliya inteeda kale, haddana waa arrin aan munaasib ahayn in bulsho heerkeeda waxbarasho iyo caafimaad uu sidaan u hooseeyo in lagu tilmaamo bulsho gaartay heer barwaaqo.

## 3. HALBEEGGA MAAMULKA IYO HAY'ADAHA

Heerka nidaamka siyaasadeed iyo hay'adaha dowladeed ayaa bud-dhig u ah qiimaynta heerka barwaaqo ee bulsho ama dowlad gaarsiisan tahay. Sarraynta sharciga iyo garsoorka, daahfurnaanta iyo isla-xisaabtanka, iyo xasilloonida iyo nabadgalyada ayaa ka mid ah halbeegyada aasaaska u ah nidaamka siyaasadeed iyo hay'adaha dowladeed.

Haddaba, inkasta oo inta badan la dhisay hay'adihii dowliga ahaa ee heerarka kala duwan, haddana dhaqangalka hannaanka dowladnimo ee Puntland weli ma aha mid si buuxda u saldhigtay. Puntland waa qayb ka mid ah Soomaaliya, halkaas oo waddanku uu galay kaalinta 179-aad ee 180 dal ee adduunka ku jira warbixinta qiimaynta dowladnimada ee Bangiga Adduunka (2024). Qiimayntaas ayaa ku dhisan lix tiir oo kala ah: isla-xisaabtanka, sarraynta sharciga, xasilloonida siyaasadeed, waxtarka dowladda, dhaqangalka xeerarka, iyo la-dagaallanka musuqmaasuqa.

Waa shaki la'aan in haddii Puntland si gaar ah loo qiimeeyo, natiijada soo baxda aysan ka duwanaan doonin midda guud ee Soomaaliya.

## 4. KAABAYAASHA DHAQAALAHA

Marka laga hadlayo kaabayaasha dhaqaalaha, inta badan bulshada Soomaaliyeed fahamkoodu wuxuu kusoo koobmaa waddooyinka, garoomada iyo dekedaha. Si kastaba ha ahaatee, kaabayaasha dhaqaalaha waa ka ballaaranyihiin intaas. Helitaanka koronto iyo biyo jaban oo bulshada si siman u gaarta waa aasaas muhiim u ah kaabayaasha dhaqaalaha, kuwaas oo halbeeg u ah in bulsho ama dal loo aqoonsado inuu tallaabo barwaaqo qaaday. Sidoo kale, heerka adeegsiga tiknoolajiyadda iyo sida bulshada ugu guurtay casriyaynta tiknoolajiyadda ayaa leh micne weyn oo lagu cabbiro horumar iyo barwaaqo.

Haddii aan Soomaaliya tusaale u soo qaadanno, Puntland waa mid ka mid ah meelaha ugu horreeya dhanka jidadka, dekedaha iyo garoomada. Balse dhanka biyaha iyo korontada, Puntland waa meelaha ugu qaalisan guud ahaan Soomaaliya, adeegyadaasna inta badan waa kuwo ku jira gacanta ganacsato gaar u leh. Dhowaanahan, cabashooyinka ugu badan ee bulshada, gaar ahaan magaalada Boosaaso oo ah xarunta gobolka Bari iyo halbowlaha ganacsiga Puntland, waxay ku saabsan yihiin qiimaha sare ee korontada. Dhanka kale, bulshada ku nool gobollada Mudug, Sanaag, Haylaan iyo Gardafuu waxay inta badan ka cawdaan waddo la'aanta iyo kala go'a isu socodka.

Haddaba, hadalka Madaxweynaha wuxuu u muuqdaa farriin ka fog xaqiiqada, isla markaana u dhigma in dowladdu ay iska indho-tirayso cabashooyinka shacabka. Xaaladda ka jirta Puntland marka loo eego dhanka kaabayaasha dhaqaalaha waa masuuliyad-darro in lagu tilmaamo barwaaqo.

## GUNAANAD


Dowladnimada casriga ahi waxay ku dhisan tahay in hadal-jeedinta rasmiga ah ee madaxweynuhu ku qotonto xigasho dastuur, xeer ama siyaasad dowladeed oo rasmi ah, isla markaana ay ahaato mid ku saleysan xaqiiqo iyo caddayn (fact-based leadership).

Hase yeeshee, Madaxweynaha Puntland, Saciid Cabdullaahi Deni, waxa uu shaaciyey in Puntland tahay barwaaqo, isagoo saldhig uga dhigay khayraadka dabiiciga ah sida kalluunka, xoolaha iyo macdanta. Si kastaba ha ahaatee, khayraadkan oo keliya looma adeegsan karo halbeeg lagu cabbiro barwaaqada ummadeed, maadaama barwaaqo lagu qiimeeyo tilmaamayaal kale oo la taaban karo sida adeegyada bulshada, horumarinta kaabayaasha, dhaqaalaha iyo tayada hay'adaha dowladeed.

Ugu dambayn, hadal-jeedinta ku dhisan gole-kafuulnimo waxa ay dhaawacdaa sumcadda dowladnimada, waxa ay bulshada ka tirtaa kalsoonida, isla markaana waxa ay muujinaysaa sida hadallada hoggaanka siyaasadeed ay u noqon karaan kuwo xaqiiqada ka fog oo aan bulshadu si dhab ah u rumaysan karin.

**WQ:** Faarax Cusmaan

# PUNTLAND:
# MURUQII IYO MAALKII OO KA TAGAYA



Siciid Axmad Cali




Xigashada Sawirka: Facebook

Dhoofinta dhaqaalaha waxaa lagu qeexaa tahriibinta hantida muuqata iyo midda aan muuqan ee ay leeyihiin muwaadiniinta dal ama maamul u dhashay. Ujeedka loo tahriibinayo uu yahay sababo ka jira maamulkaas, sida degenaansho la'aan siyaasadeed, dhaqaale, qiimo dhac lacageed iyo hanjabaado kaga imaanaya kooxo abaabulan. Muwaadinku inuu dhaqaalihiisa uu kala baxo dalkiisa sharci u diidaya ma jiro. Isagoo u aaneynaya inuu ka tahriibayo sababaha ay ka midka yihiin, qiima-dhaca lacageed, hubanti la'aanta amni iyo amar ku taagleynta dowladeed. Sida canshuuraha aan xadeysneyn.

Hay'ada Dhaqaalaha Adduunku cilmi-baaris ay sameysay ayay ku sheegtay in Soomaaliya ay ka jirto tahriibin hantiyeed aad u kordhaysay toddobadii sano u dambeysay. Waxay cilmi-baaristaas ay ku xustay in Soomaaliya dibedda looga saarey hanti gaaraysa hal dhibic afar bilyan oo Dollar. Hantidaas meelaha loo tahriibiyay waxa ay ku sheegtay waddamada Kenya, Turkey iyo Afrikada dhexe. Tahriibkaas dhaqaale meelaha uu sida weyn u saameeyay waxaa ugu horeysa Puntland, sida madallo furan ay ka qirteen madaxda sare ee heer wasiirro ilaa madaxweyne.

Puntland waxa ay sidoo kale la daalaa dhacaysaa nooc tahriib/dhoofid ah, oo aynu ku tilmaami karno inuu yahay "abaar muruq iyo maskaxeed" bulshada ku habsata marka inta xirfadda iyo aqoonta leh ay dalka iskaga dhoofaan amaba tahriibaan una dal doorsanaya meel fursad dhaanta deegaanadooda.

Wasiirka Howlaha Guud Gaddiidka iyo Guriyeynta Puntland Faarax Cawad Jaamac waxa uu baarlamaanka hortooda ka sheegay "in xirfadlayaashii ay wasaaraddu iyadu tacabka gelisay ay ka tageen kolkii wasaaraddu ku fashilantay daboolidda xuquuqdooda", sidoo kale heerka shaqo la'aanta waxa ay maraysaa halkii ugu sareysay. Ardayda waxbarashada sare dhamaynaysa way kordhayaan sannadba sannadka ka dambeeya, iyadoo dufcadba tan ay ka dambeyso ay ka rajo xun tahay. Saddexdii sano ee la soo dhaafay ardayda waxbarashada sare ku biiraysa waa ay sii yaraaneysay halka uu sare u kacayey dhallinyarada aqoonta iyo xirfad ku hubeysan ee badaha ku dhimanaysa iyagoo raadinaya fursadda ay ka waayeen deegaanadooda Puntland. Markii dhallinyaradu ay madaxda sare ee dowladda weydiiyeen arrinkan sidii wax looga qaban lahaa waxaa madaxweyne Siciid Cabdullaahi Deni ugu jawaabay "dhallinyaradu dabaasha ha bartaan".

# SABABAHA KEENAY TAHRIIBKA DHAQAALE IYO DHALLINYARO

Sababaha ugu waa-weyn ee keenay tahriibka dhaqaale iyo dhallinyaro Puntland waxaa kamid ah:

- Deganaanshiyo la'aan dhaqaale: Puntland waxa hadda ku socda hoos u dhac aad u weyn ee dhanka dhaqaalaha. Puntland ma lahan lacag rasmi ah oo bulshadu wax ku kala iibsato, taasina waxa ay dhaxal siisay sicir barar ku dhaca dhaqaalaha iyo in wax walba lagu jaangooyo doolar (dollarization), taasoo saamaysay suuqa siiba ganacsiyada yaryar.

- Habacsanaan maamul: Maamul xumada iyo musuqa, waxa ay saamayn xooggan ku leeyihiin dhaqaalaha. Haddii aysan jirin siyaasad taabbo-gal ah oo ka degsan dhaqaalaha amaba aysan si toos u hawlgelin haayadaha u xilsaaran.

- Isbeddelka Cimilada: Isbeddelka cimiladu waxa uu saamayn muuqata ku leeyahay dhaqaalaha. Abaaraha soo noqnoqda waxa ay aad u saameeyeen dhaqaalaha dadka ku dhaqan Puntland iyadoo qoysas badan oo reer guuraa ah oo xoolihii ka dhammaadeen ay magaalooyinka waa-weyn u haajireen, kuwaasoo ku tiirsanaa xoolaha oo kamid ah wax soosaarka ugu weyn ee dhaqaalaha Puntland.

- Fursadaha shaqo ee aan dowliga aheyn: Puntland aad bay u yaryihiin xarumaha shaqo ee aan dowliga aheyn, ee bixiya fursado shaqo gaar ahaan ganacisyada gaarka loo leeyahay. Sidoo kale ma jiraan warshado waa-weyn oo ay dadku u shaqo tagaan, kuwaasoo gacan ka geysan lahaa fursadaha shaqo gaar ahaan dhallinyarada oo ah jiilka mustaqbalka.

- Lacagta baada ee argagixisada: Kooxaha argagixisada gaar ahaan Daacish ayaa sanadihii u dambeeyay lacago badan oo baad

ah ku soo rogtay ganacstada Puntland gaar ahaan kuwa jooga magaalada Boosaaso, taasoo keentay in ganacsato badan ay hantidooda kala baxaan dalka.

- Gargaarka oo yaraaday: Boqolaal dad ah oo kala duwan ayaa ku tiirsanaa shaqooyinka ay fuliyaan haayadaha caalamiga ah ee gargaarka, kuwaasoo sanadihii u dambeeyay yaraanayay. Joojintii Madaxweynaha Maraykanka Donald Trump ee hay'addii USAID bilowga sanadkan ayaa saamayn weyn u geysatay qaar kamid ah haayadaha gargaarka oo sababtay in boqolaal shaqaale kala duwan ah la fasaxo, kuwaasoo maanta shaqo la'aan ah.

- Aqoon aan suuqa la jaanqaadeyn: Ardayda jaamacadaha ku biiraya wey sii siyaadayaan, iyadoo xarumaha waxbarashada sare lagu eedayn karo in aysan ardayda ku hubeyn aqoon iyo xirfado looga baahanyahay suuqa shaqada. Cilmibaaris uu soo saaray Machadka Cilmi-baarista Heritage 2021-kii, waxay sheegtay in nidaamkeenna waxbarashada sare uusan soo saarayn arday leh xirfadaha suuqa looga baahanyahay. Ardayda waxbaratay waxa ay ula sinnaanayaan fursadaha kooban ee waddanka ka jira kuwa aan waxbaran marka aysan lahayn farsamada iyo aqoonta loo baahanyahay.

- Eex iyo qabiil: Dhallinyarada badankood waxa niyadjabka iyo quusta solansiiya waxaa door weyn ka ciyaara qabiil iyo eex. Shaqooyinka dowliga ah iyo kuwa gaarka ah, inta badan waxaa lagu bixiyaa qabiil halkii loo mari lahaa hanaan ku salaysan kartida, aqoonta iyo xirfada qofka.

## SIDA LAGU YARAYN KARO TAHRIIBKA DHAQAALE IYO DHALLINYARO

Dowladda Puntland waxaa la gudboon si ay wax uga qabato dhiig baxa muruq iyo maalba leh ee ku socda dadkeeda iyo dalkeeda inay tixgelin siiso qoddobadan:

- Dib u kalsooni siin: Dowladda waxaa la gudboon inay dib u abuurto jawi ganacsi. Dagaalka lagula jiro kooxda Daacish ee ka socda Buuraha Caal-Miskaat waa tilaabo fiican oo dowladda lagu bogaadin karo, taasoo keenaysa in ganacsatada reer Puntland aysan bixin lacago baad ah oo ay siin jireen kooxdaas argagixisada ah. Ganacsatada waxaa la gudboon in ay ku kalsoonaadaan dalkooda oo ay maalgelin sameeyaan maadaama la ciribtiray khatartii argagixisada Daacish.

- Siyaasad dhaqaale: Dowladda waxaa laga doonayaa inay si dhab ah u wajahdo caqabadaha dhaqaale ee Puntland, maadaama xaaladda dhaqaale ee liidata ay saamayn ku leedahay dhinacyo badan. Waa in dowladdu sameysaa qiimeyn xeel dheer iyo siyaasad dhaqaale oo wax ku ool ah, taasoo gaari karta meelaha hoos u dhaca ku yimid, isla markaana dhiirrigelisa hal-abuurka, maalgelinta, iyo fursadaha shaqo ee dhallinyarada.

- Dib u qaabeynta nidaamka waxbarashada: Shaqo la'aantu waxa ay welwel aad u weyn ku haysaa dadka reer Puntland. Caqabadaha shaqo la'aanta waxyaabaha keenay qeyb waxaa ka ah nidaam waxbarasho oo aan soo saarayn arday wajihi kara suuqa shaqada, oo aan ku qalabeysneyn aqoontii iyo xirfaddii loo baahnaa. Nidaamka waxbarashada waa inuu sameeyaa cilmibaaris suuqa shaqada kadibna qaabeeyaa qofka suuqa looga baahan yahay.

- Dhiirrigelinta hal-abuurka iyo dhalinyarada: Dowladda Puntland waa inay dhiirrigelisaa hal-abuurka dhallinyarada iyadoo ku taageeraysa maalgalin. Hal-abuurka dhallinyaradu hadii tixgelin la siiyo iyadoo dowladdu kaashanayso ganacsiyada waaweyn iyo saaxiibada caalamiga ah, taasi waxay hoos u dhigi kartaa tahriibka waxaana abuurmi doona fursado shaqo.

W/Q: Siciid Axmad Cali

# SIDEE U KALA SAARISTA SAYNISKA IYO AARTISKA U SAAMAYSAA ARDAYDA DUGSIYADA SARE EE PUNTLAND?



Bashiir Suuley



Xigashada Sawirka: Facebook

Marxaladda dugsiga sare waaa mid ka mid ah kuwa ugu muhiimsan ee uu maro ardayga ku jira safarka waxbarashada. Sida ku xusan Siyaasadda waxbarashada ee Soomaaliya dugsiyada sare ee Soomaaliya wakhtigoodu waa afar sano. Ardayduna waxa ay qaataan maaddooyin isku dhaf ah loomana kala saaro Saynis iyo Aartis. Puntland, xagga waqtiga waa ay la wadaagtaa Soomaaliya inteeda kale, laakiin waxay uga duwantahay in ardayda loo kala saaro Saynis iyo Aartis marka ay gaaraan fasalka saddexaad ee dugsiga sare, gaar ahaan iskuullada ay dowladdu maamusho. Haddaba, waxa aan maqaalkaan ku eegi doonnaa saameynta ay kala doorashadu ku yeelato ardayda dugsiyada sare ee Puntland ee kala aada labadaas qeybood.

Si guud, kala saaridda ardayda ee dugsiyada sare waa hab waxbarasho oo jira ayna ku dhaqmaan dalal badan oo caalamka ah oo aan tusaale u soo qaadan karno dalka aan dariska nahay ee Kenya. Waxaana jira sababo dhowr ah oo loo door-bido in ardayda la kala saaro inta aysan jaamacad gaarin, waxaana ugu muhiimsan; U diyaarinta ardayga takhasuska ku habboon; Tusaale, ardayda mustaqbalka jecel in ay bartaan kulliyado Saynis ah, waxa ay ka caawinaysaa in ay xoogga saaraan maaddooyinka aas-aaska u ah Sayniska sida: Fiisikis, Baayoloji, Xisaab, Kimistari iwm. Sidaas si la mid ah qolyaha raba in ay Aartis bartaan waxa ay xoogga saarayaan inta asalka u ah kulliyadaha Aartis-ka ah.

Haddaba, si looga dhabeeyo ujeeddooyinka guud waa in uu jiraa hab-raac loo maro marxaladda kala saarka gaar ahaan marka la joogo fasalka saddexaad ee dugsiga sare oo ah halka ay ardaydu ku kala bayraan marka Puntland la joogo.

Si guud dalal badan oo ka mid ah kuwa adeegsada qaabka kala qeybinta ardayda waxa ay ka simanyihiin arrimaha soo socda xilliga kala saarista ardayda:

1. Qiimeynta darajada ardaygu ee fasalladii hore: Doorashada ardayga waxaa qeyb weyn ka ah imtixaannadii hore ee uu galay, tusaale ahaan haddii uu ku fiicnaa Xisaab, Fiisikis, Baayoloji iyo Kimistari waxaa u furan in uu aado Saynis. Dhanka kalena haddii uu ko roonyahay maaddooyinka la xiriira Aartis-ka waxa uu dooran in uu dhankaas aado.
2. Ogaansha xiisaha ardayga: Arday kasta waa in uu si guud u yaqaan ama loo ogaadaa waxa uu xiiseeyo ama jecelyahay si loogu saleeyo meesha uu aadi karo.
3. Takhakhuska ardayga ee mustabalka: Waa mid ka mid ah kuwa ugu muhiimsan ee la rabo in ardaygu doorashadiisa ku saleeyo. Ardayga mustaqbalka raba in uu barto maaddo Aartis ah waa in uu hadda doortaa Aartis, kan kulliyad Saynis ah doorbidayana waxaa in uu doortaa Saynis.
4. U jeeddo qaran: Mararka qeybtood dalka ayaa go'aan ka gaara iyadoo oo aan laga tagayn qodobbada kore inta ugu muhiimsan sida loo kala badinayo ardayda kala aadaysa labadaas qeyboood. Tusaale ahaan, haddii dalku rabo in uu sannadaha soo aaddan soo saaro dhakhaatiir iyo injineerro badan waxaa la doorbidaa in arday badan loo diro ama lagu dhiirigeliyo in ay Saynis doortaan.

# QAABKA ARDAYDA LOO KALA SAARO PUNTLAND

Guud ahaan ma jiraan siyaasad iyo xeer qoran oo qeexaya sababta ardayda loo kala saarayo iyo jidka ay tahay in loo maro kala saaristooda toonna. Ardaygu marka uu ka soo gudbo fasalka labaad waxa uu aadaa meeshii uu doono iyada oo laga yaabo in ay tahay mid aan ku habboonayn. Waxa aan xog ka raadiyey arday badan bal in aan ogaado waxa ugu weyn ee jiheeya maadaama aysan jirin siyaasad loo diyaariyey, waxaana ii soo baxday in ardayda waxbarshada ku liidata ama akhriska iyo dedaalka neceb ay aadaan Aartis sababtoo ah in ay maqleen waa maaddo fudud oo kaliya. Arrintaas ayaana keentay in Cumar Samatar oo ah dugsiga sare ee ugu weyn guud ahaan Puntland uguna ardayda badan sannad dugsiyeedkii 2024-2025, 8 fasal oo ka mid ah 12 fasal oo fasalka saddexaad ee dugsiga sare ay Aartis doorteen halka 4 na Saynis doorbideen.

Kaaga sii darane, haddii ardaygu ku dhaco dhammaan maaddooyinka Sayniska ah imtixaannadii fasallada koowaad iyo labaad ee dugsiga sare laakiin uu baasay celcelisan ahaan weli waxa uu haystaa fursad uu ku dooran karo

Saynis oo majiro wax u diidaya. Sidaas oo kale, Aartis-ka ardayga ku dhacay maaddooyinka ugu muhiimsan, haddana Aartis waa uu dooran karaa.

## WAXAA DHACA MARKA AY JAAMACADDA GAARAAN

Guud ahaan wacyiga ardayda ka imaanaysa dugsiga sare aad buu u hooseeyaa. Wuu yaryahay arday yaqaan kulliyadda saxda ah ee ku habboon iyo sababta uu ku dooranayo. Waxaana ka qabsada jahwareer adag.

Dhanka kale, jaamacadaha badankooda waxa aad ku arkaysaa arday ka yimid Aartis oo labadii sano ee u dambeeyey uguna muhiimsanaa aan soo arag maaddo Saynis ah oo haddana dooranaya kulliyad Saynis ah, mana jirto xeer ka reebaya iyo maaddooyin laga fiirinayo. Sidaas oo kale arday ka yimid Saynis ayaa kulliyad Aartis ah aadi kara.

Qodobka la xiriira takhasuska ardayga ee jaamacadda waxa uu ahaa kii aan soo sheegay in uu yahay midka ugu muhiimsan ee ardayda loo kala saaro, laakiin ardayda Puntland waxaaba uu ku noqdaa caqabad, waayo, ardayga Aartiska ka yimid waxa ay ahayd in uu Aartis aado, laakiin haddii uu kulliyad Saynis ah doorto waa caqabad weyn oo saameyn ku yeelanaysa hayaankiisa waxbarasho.

## GUNAANAD

Arrinta kala saarista ardayda waxa ay keentay jahwareer weyn. Muddo 8 sano ah oo aan bare ka ahaa waxbarashada sare inta badan waan arkayey dhibka ah ardayda oo aadaysa kulliyad aan la xiriirin wixii ay dugsiga sare ku soo barteen. Haddaba, waa in arrintaas wax laga qabtaa. Xalka ugu haboonna waxa uu noqon karaa:

1. In gabi ahaanba meesha laga saaro kala saarista oo ardayda loo daayo in ay wada qaataan maaddooyinka dugsiga sare sida inta badan ay sameeyaan dugsiyada gaarka loo leeyahay.
2. In saddex laga dhigo oo lagu soo daro doorasho guud oo ardaydu isku qaadan karaan maaddooyinka oo dhan kuwii rabaana ay kala bixi karaan, laakiin loo sameeyo hab-raac ardayda kala saaristooda loo maro, iyadoo ardayga go'aanka loo daynayo haddana waa in uu jiraa jid ay maraan oo aysan samayn wixii ay doonaan. Tusaale arday dhacay dhammaan maaddooyinkii Saynis-ka ma jirto sabab uu Saynis u dooran karo.
3. Jaamacaduhuna waa in ay xeerarkooda adkeeyaan, oo maaddooyinka Saynis-ka ah aan loo oggolaan arday Aartis ka yimid oo aan labadii sano ugu muhiimsanaa dugsiga sare soo arag Saynis.

Ugu dambeyn, saameynta arrintaas ka dhalata waa dhibaato weyn oo taagan ayna walaac weyn ka qabaan guud ahaan bahda waxbarashadu, sidaas darteed waxa ay u baahantahay in si degdeg ah wax looga qabto.

**WQ:** Bashiir Suuley

# SOOMAALIYA:

## MAXAY SIYAASADU U SALDHIGAN WEYDAY, XAGEE ISKA QABAN LA'DAHAY?




Axmed Saciid Aw-nuur



**Xigashada Sawirka**: Reuters

# HORDHAC

Marka hore, si aan u fahano qeexista iyo macnaha siyaasadda bal aan eegno sida ay ku sifeeyeen ama ku qeexaan aqoonyahanada cilmiga siyaasaddu (Political scientist), Harold Lesswell, (1936), Wuxuu siyaasadda ku macneeyey in ay tahay qaybinta khayraadka iyo awooddaha bulshada dhexdeeda (distribution of power and resources). Harold wuxuu xoogga saarayaa in bulshada qaybaheeda kala duwan loogu qaybiyo khayraadka dalka si siman sidoo kale awoodda dalka ay tahay in shacabku leeyahay sida loogu qaybinayana ay saldhig u tahay shuruuc iyo nidaamyo heshiis lagu yahay oo la raaco lana wada ilaashado.

Andrew Heywood (1997), wuxuu siyaasadda ku qeexay inay tahay shaqo dadku ku sameeyaan, ku dhowraan, kuna bedelaan sharciyadooda guud oo noloshooda khuseeya, wuxuu hoosta ka xarriiqayaa muhimada ay leedahay dejinta shuruucda bulshada lagu dhaqayo dantoodana lagu ilaalinayo, iyo sidoo kale xalinta khilaafaadka bulshada dhexdeeda.

Bernard Crick (1962) wuxuu siyaasadda ku macneeyey hab dhaqan dadku isku maamulaan, ku xalliyaan khilaafkooda, iyagoo dariiqa wada hadalka iyo isu tanaasulka u maraya kana fogaanaya adeegsiga xoogga iyo qalalaasaha, wuxuu hoosta ka xariiqayaa muhiimada dariiqa wada xaajoodka nabdoon uu u leeyahay horumarinta siyaasada.

Qeexidaha kor ku xusan oo sadexdaas caalim siyaasadeed waxay ka simanyihiin muhiimada siyaasaddu siinayso, qaybinta awooda iyo khayraadka, xallinta khilaafaadka iyo dejinta shuruuc dadku isku raacsan yihiin oo ay ku dhaqmaan ilaashadaanna.

Haddaba; ma jiraa xiriir ka dhexeeya siyaasadda iyo danaha shakhsiga ah ama danaha koox gaar ah, sideese siyaasadu u qaabaysaa danta shakhsiga ah?

Culimo badan oo siyaasadda wax ka qoray waxay ku doodaan shakhsiyaadka ka qayb galaya siyaasadda muhiimadooda koowaad waa inay ilaaliyaan ama horumariyaan danahooda dhaqaale, bulsho iyo afkaareed. Anthony Downs (Economic theory of democracy, 1957) wuxuu ku doodayaa cod bixiyayaashu waa inay u dhaqmaan si macquul u ah ayna xulashadooda siyaasadeed ku saleeyaan wixii dantooda anfacaya, Downs wuxuu aaminsan yahay in siyaasadu tahay suuq ay jilayaasha siyaasadu ku tartamaan iyagoo soo bandhigaya siyaasado waafaqaya danaha shaqsi taas oo uu ku macneeyey inay ururrada shaqaalaha, ururada ganacsatada, xisbiyada siyaasaddu ay matalaan danaha shaqsiyaadka iyo kooxaha hadba intii dantoodu isku xirantahay waxayna kooxahaasu saamayn ku yeeshaan siyaasadda si ay u ilaaliyaan danahooda.

Danaha gaarka ahi waxay ku dhiiri geliyaan daneeyayaasha inay siyaasadda ka hawlgalaan iyagoo u maraya dariiqa codaynta iyo xodxodashada siyaasadeed (Voting and lobbying). Mancur Olson (The logic of collective action, 1965) wuxuu taxliil weyn ku sameeyey sida shaqsiyaadka wadaaga dan gaar ah ay u dhaqaajin karaan siyaasadda iyagoo isku duuban xoogana aan saarayn dan shaqsi oo kooban. Jilayaasha siyaasadu waxay isticmaalaan fikrado ka turjumaya hadafkooda siyaasadeed (Political ideology), dowaldaha iyo asxaabta siyaasaduna waxay ku dhismaan oo saldhig u ah afkaarta siyaasadeed oo ay aaminsan yihiin (ideologies).

# FAHAMKA SOOMAALIDA EE SIYAASADDA

Inta badan Soomaalidu waxay siyaasadda u fahansiyihiin khiyaano, qofka siyaasiga ah waxay ka aaminsan yihiin inuu yahay qof afkiisa iyo uurkiisu ay is khilaafsan yihiin, qof waxa uu sheegayaa aysan dhab ka ahayn, ceeb uma arkaan in siyaasadda la musuqmaasuqo oo lacag lagu kala qaato, ma jiraan mabaaddii siyaasada Soomaalidu salka ku hayso; balse waxaa cad in siyaasadda Soomalida ay saldhig u tahay dan shaqsi, qabyaalad iyo ku tiirsnaan dowlado shisheeye, habka uu qofku madaxnimo ku gaaraana ay tahay inuu isticmaalo qabyaalad, laaluush iyo inuu taageero dhaqaale ka raadsado ajnabi.

Inta badan Soomaalidu ma fahansana in siyaasadu tahay furaha waxkasta, haddii ay siyaasadu hagaagi weydo ama xasili weydo dhaqaaluhu ma hagaagayo, ammaanku sidoo kale, xasilooni siyaasadeed baa abuurta amni iyo dhaqaale wanaagsan. Marna siyaasadda Soomaalidu ma helin xasillooni.

## QABYAALADDA IYO SIYAASADDA SOOMAALIDA

1960-kii markii xornimada la qaatay, dalka Soomaaliya waxaa laga hirgeliyey nidaanka asxaabta badan, asxaabtii la sameeyey waagaas kuma dhisnayn afkaar siyaasadeed (political ideology), waxay taageero ka raadsan jireen deegaamada qabiilkoodu degan yahay, inkasta oo meelaha qaar ay jirtay dad laga soo dooran jiray deegaamo aan qabiilkoodu u badnayn; haddana qabyaaladu saameyn weyn ayay markii dambe ku yeelatay nidaam siyaasadeedkii Soomalidu ku dhaqmaysay. Ilaa hadana qabyaaladu kaalin weyn bay ku leedahay siyaasadda, tusaale, qof Soomaali ah oo ku nool meel ka mid ah Soomaaliya wuxuu aad ugu farxaa in qof ay isku hayb yihiin uu dowladda madax ka noqdo, laga yaabee qofkaas in uusan aqoon u lahayn; laakiin uu yaqaan inay isku qabiil yihiin. Su'aalaha ay Soomaalidu waqtiga ku lumiyaan inay ogaadaan waa qabiilka uu ka dhashay qofka madaxda ah, laakiin isma waydiiyaan qofkaan madaxda ah qorshahiisa dowladeed iyo afkaarta uu soo bandhigay oo uu ku hormarinaayo siyaasadda, dhaqaalaha iyo amniga dalka.

## DANAYSIGA SHAQSIGA AH IYO SIYAASADDA SOOMAALIDA

Inta badan siyaasiga Soomaaliga ahi wixii dantiisu maalintaas ku jirto buu siyaasad fiican u yaqaan, haddii shalay wuxuu diidanaa uu maanta dantiisa ka dhex arko wuxuu oranayaa waa arrin wanaagsan waana ku dagaalamayaa.

Sidoo kale, inta badan siyaasiga Soomaaliga ah markii uu kursiga ugu sarreeya ku fariisto, afar arrimood buu xoogga saaraa; kow, waa inuu dhaqaale badan ka sameeyo xukunka, labo, waa inuu qoyskiisa ka xoolaysiiyo, saddex, in saaxiibadiis ay xoolaystaan, iyo tan afraad oo ah in uu ka shaqeeyo sidii uu xukunka u sii joogi lahaa. Ma jiraan shuruuc xannibaya ama xakamaynaya Madaxweynaha, sharcigu isaga ma qabto, isaguna ma ixtiraamo, ku dhaqanka sharciga (rule of law) meeshaba ma yaal. Badanaa waxaa sharciga lagu ciqaabaa shacabka ama dadka shaqaalaha ah, taas macneheedu waxa weeye ninkii xoog leh sharciga isna ma ixtiraamo lagumana dhaqi karo.

Qofka madaxda ahi waa tusaale (role model), wuxuu noqon karaa tusaale wanaagsan ama tusaale xun, hadba sida uu u dhaqmo, saamayn bayna ku yeelanaysaa dadka uu xakumo ama la shaqeeya, iyo sidoo kale bulshada guud ahaan, waa sababta loo yiraahdo hoggaamiyaha wanaagsani isbedel buu keeni karaa markii uu naftiisa ka bilaabo, inta ka hooseysana waa ku dayanaysaa, shacab weynuhuna sidoo kale hab dhaqankiisu saamayn buu ku yeelanayaa.

## LAALUUSHKA IYO SIYAASADDA SOOMAALIDA

Waxaa dhaqan iyo caado noqotay in qofka madaxnimo rabaa sida keliya uu ku gaari karaa ay tahay inuu helo lacag badan oo uu laaluush u bixiyo; bal eeg doorashooyinka Soomaaliya ka dhaca, ma xasuusan kartaa doorasho kasta inta lacag lagu kala qaatay, hadday ahaan lahayd doorashooyinka dowlad goboleedyada iyo tan dowladda federaalka? Inta badan lacagtaas waxay ka timaaddaa dibada ama dalal shisheeye, waa fasahaad ku dhacay siyaasadda Soomaliada, dadka wax dooranayaa waxa keliya oo ay qiimeeyaan waa in ay faa'iidaan lacag waqtigaas, codkoodana gataan, iyagoo weliba u tegaya musharax kasta oo lacag ka qaadanaya. Barnaamjika tartmayaashu soo bandhigaan iyo shaqsiyadda qofka waxaa ka muhiimsan laaluushka la qaadanayo. Ma jiro cod bixiye qiimeeya barnaamijka siyaasadeed, dhaqaale iyo bulsho oo ay tartamayaashu soo bandhigaan, kaasoo codka uu bixinayo ku saleeya oo kala doorta barnaamijka waxqabad ee tartamayaasha, shaqsiyadooda iyo taariikhdooda wax qabad.

## GUNAANAD

Inta fahamka dadka Soomaaliyeed ay ka qabaan siyaasadda uu isbedelayo, wacyigoodu hagaagayo, siyaasadana loo fahmayo inay tahay wax danta dadka iyo dalka lagu hagaajinayo, oo aan dan shaqsi ah u adeegin ee danta guud u adeegta, ee ku dhisan mabaadii oo aan ku dhisnayn danta shaqsiga ah ee maanta taagan, aan laga xoolaysan ee dadka noloshooda lagu hagaajiyo, qofka siyaasiga ah oo xilka raadinaya lagu qiimaynayo waxqabadka uu soo bandhigo iyo ajandihiisa siyaasadeed, dhaqaale iwm ee aan lagu qiimaynayn iyo qabiilkee yahay, muxuu laaluush bixin karaa si uu madaxnimada u iibdsado. Inta fikirka noocaas ahi jiro siyaasadda Soomaalidu ma saldhigan doonto, waxna kama hagaagi doonaan.

**W/Q:** Axmed Saciid Aw-nuur

# CAQABADAHA KU GEDAAMAN WAXBARASHADA AASAASIGA AH EE PUNTLAND IYO SIYAAABAHA LOO XALIN KARO



Cabdiraxmaan Shiikhdon



**Xigashada Sawirka**: Wasaaradda Waxbrashada Puntland

# HORDHAC

Waa arrin laysku wada raacsan yahay muhiimada waxbarashada aasaasiga ay u leedahay caruurta, taas oo ah in cunug/ilma kasta uu xaq u leeyahay in uu helo waxbarasho tayo leh oo la saanqaadaysa baahidiisa iyo nolashiisa.Iyada oo laga duulayo arrintaas, dugsiyada aasaasiga ah waxa ay maanta ka furan yihiin deegaano badan oo kuyaala Puntland iyo dhammaan deegaanada kale ee Soomaaliya, hase yeeshee waxaa dugsiyadaas ka faa'iideysta in ka yar saddex-meelood (32.97% Puntland, 31% Soomaaliya). Caruurta dugsiyada dhigata ayaan helin waxbarasho leh tayada laga filayey, oo garwadeen u noqon karta hayaanka waxbarasho ee ardayda. Akhir-qorista afka iyo aasaaska xisaabta oo saldhig u ah barashada dugsiyada hoose ayaa ah mid aad u hoosaysa, taasoo ah meelaha laga qiyaaso natiijooyinka waxbarashada. Sida ay qoreen qiimeyno lagu sameeyey waxbarashada Puntland, waxaa hoosaysa akhris-qorista af-ka iyo xisaabta aasaasiga ee ardayda dugsiyada hoose iyo dhexe. Sida ay Soomaalidu ay horey u tiri, "Alif wixii ku qaloocday Al-baqra kuma toosaan" taas oo ah in loo baahan yahay in aasaaska akhris-qorista afka iyo aasaaska xisaabta ay ku toosaan fasalada hore ee waxbarashada aasaasiga ah. Waxaa jira caqabado badan oo sababay hooseynta tayada waxbarashada guud ahaan Soomaaliya, kuwaas oo qaar ka mid ah, aan kaga hadli doono qoraalkan.

# MILICSIGA TAARIIKHDA WAXBARASHADA PUNTLAND

Puntland waxay ahayd meelihii ugu horeyey ee dib looga yagleeyey waxbarashada aasaasiga, ka dib burburkii dalka, taasoo ay hormuud u ahaayeen dad iskood isku abuubulay si ay u buuxiyaan kaalinta waxbarashada ee ay bulshadu u baahnayd. Xilligaas waxa ay inta badan dugsiyadu ku koobnaayeen magaalooyinka waaweyn oo keliya. Waxbarashadu waxay ahayd mid ku salaysan xaalada degdeg ah (emergency education), madaama uusan jirin manhaj mideysan, macallin tababaran, dhisme dugsi u qaabaysan iyo waxbarasho isku xiran oo hal meel ah laga maamulo. Dugsiyadii ugu horeyey ee ilaa maanta jira waxaa ka mid ah Al-Waaxa (Garoowe), Nawaawi (Boosaaso, ka dib meelo kale) iyo Shaafici (Boosaaso), kuwaas oo la furey horaantii 90-kii. Sidoo kale waxaa iyana la furey dugsiyadii dowlada, oo maamulo ka jiray xilligaas gobolada ay garwadeen ka ahaayeen. Dugsiyadii ugu horey ee ka qayb galay imtixaanka naqliga ah ee fasalka afraad (2003), waxa ay ahaayeen Cumar Samatar (Gaalkacyo), Muuse Yuusuf (Laascaanood), Gambool(Garoowe), Shiikh Cismaan (Qardho) iyo dugsiga sare ee Boosaaso (Boosaaso). Dugsiga Al-muntada ee magaalooyinka Qardho iyo Buurtinle ayaa ka mid ah dugsiyadii sare la furay ka hor 2000. Sannadkii 1998, tirada ardayda dugsiyada hoose/dhexe, waxa ay ahayd 31, 420 arday(11%) (UNICEF 1998). Sidoo kale, 1999, gobolka Nugaal, waxaa ka furnaa 14 dusgi oo ay dhiganayeen 2,065 arday. Arrimahaasi, waxa ay muujinaysaa heerka ay waxbarashu joogtay xilligaas.

Intii uu dhisnaa maamulka Puntland, waxa jira waxyaabo badan oo laga qabtay waxbarashada, sida mideynta manhajka, qorista iyo daabacaada buuggaagta dugsiyada, samaynta siyaasadaha iyo sharciyada waxbarashada, dhismayaasha dugsiyada, xogta waxbarashada (EMIS), tababarada macallimiinta iyo waxyaabo kale oo badan. Waxyaabaha ay waxbarashada Puntland horseedka u ahayd waxaa ka mid ahaa qaadista imtixaanka fasalada sideedaad iyo 12-aad, iyo xogta waxbarashada. Dowlada Federaalka markii ugu horeysay ay bilowday imtixaanka iyo uruurinta xogta waxaa gacan ka gaystay qaar ka mid shaqaalihii Puntland ee dhinaca imtixaanka iyo xogta waxbarashada. Tirada ardayda iyo dugsiya ayaa si aad ah kor ugu kacay(31,420 arday 1998, ilaa 235,129 arday 2024) (EMIS, Puntland, 2024. Hase yeeshee, boqolayda tirada ardayda dugsiyada hoose/dhexe ayaa weli aad u hoosaysa, taas oo ahayd 32.97% sannadkii 2024 (EMIS, Puntland, 2024). Hase yeeshee, dadaalkaasi ma daboolin baahidii waxbarashada ee jirtay dhinacyada tirada iyo tayada.

# CAQABADAHA

Waxaa jira caqabado badan oo ka qayb qaatay hooseynta tayada waxbarashada dugsiyada aasaasiga ah oo saldhig u ah guusha waxbarashada ka dambaysa dugsiga hoose/dhexe. Qormadaan waxa aan ku soo qaadanaynaa dhowr caqabadood oo waaweyn:

1. Awoodda wasaaradda: Waxbarashada oo aan si buuxda u taabo gelin: Sida caadiga ah wasaaradaha waxbrashadu waxa ay leeyihiin labo awoodood oo ay ku maamulaan tayaynta iyo taabo-gelinta waxbarashada, kuwaas oo kala ah awooda siyaasadeed ee fulinta shariciyada, halbeegyada iyo siyaasadaha waxbarashada. Tusaale, ahaan waxaa qoran halbeeg aasaasiga ah ee lagu cabiro haboonaanta goobta waxbarashada, hase yeeshee dugsiyo badan ayaan buuxin karin shuruudaha laga rabo goobta waxbarashada. Awooda kale ee ay wasaaradda waxbarashadu adeegsato waa dhaqaalaha, taas oo ah shidaalka dhaqaajinaya cududa shaqada. Labadaas awoodood ayaan si buuxda u shaqayn. Arrintaasi waa tan saldhiga u ah dhammaan caqabadaha kale oo dhan.

2. Afka waxbarashada: Horey waxaa Puntland uga jiray, in ardayda dugsiyada hoose/dhexe ay wax ku bartaan saddex af oo kala ah, Soomaali, Carabi iyo Ingiriis (Medium of Instruction). Wasaaradda waxbarashada ayaa horaantii sannadkii 2015,

qabatay shir ay ku doonaysay in waxbarashada aasaasiga ah lagu barto afka hooyo, hase yeeshee cadaadis ka yimi xagga dugsiyada, ayaa markii dambe keenay in wax lagu barto af Soomaaliga, Carabiga iyo Ingiriiska. Hadda, dhammaan dugsiyadii wax ku baran jiray afka Carabiga waxay u guureen afka Ingiriiska hal maalin. Tusaale ahaan arday fasalka 6-aad wax loogu dhigayey af Carabi, ayaa sannadkii xigey wax loogu dhigay afka Ingiriiska, iyadoo aysan jirin waqti kala guur, macallimiinta oo lagu tababaro afka waxbarashada iyo ardayda aan la kobcin akhris-qoraalka afka ay wax ku baranayaan. Su'aasha is weydiinta mudan, waxa ay tahay sidee ardaygu wax ugu baran karaa, af uusan wax ku qori karin, fahmi karin oo uusan akhrin karin? Waxa kale oo su'aali ka jirtay, macallinku awood ma u leeyahay in uu afka Ingiriiska wax ku dhigo, isaga oo aan la tababarin? Nin ka mid ah, kormeerayaasha dugsiyada Puntland, ayaa ii sheegay, in dugsi uu booqday, labo sanno oo isku xigta la kulmay, macallin af Carabi ku dhigaya maadada sayniska, sannadkii dambana ku dhigaya af Ingiriisi, haddana aqoonta uu u leeyahay labada luqadood aysan wanaagsanayn. Waxa kale oo lays weydiin karaa dalka ma ka jirtaa kulliyad tababarka macallimiinta afka Ingiriiska ka dhiga dugsiyada hoose/dhexe ka hor inta aysan shaqada macallinimada bilaabin? Arrintani waxa ay abuurtay in arday badani aysan fahmin waxa loo dhigay, hoosaynta dhibcaha ardayda iyo ardayda oo hardan adag ugu jira in ay wax ku bartaan af asyan garayneyn. Arrintani waxay keentay fahan ah in tayada waxbarashadu ay tahay afka Ingiriiska oo wax lagu barto, waana tan sababtay in dugsiyo tiro badan ay hal habeen ah u guuraan afka Ingiriisiga si ay u helaan arday. Ardayda aan aadka u fahmin afka ay wax ku baranayaan, waxaa ay ku keeni kartaa gaabis ku yimaada dhaqanka iyo dhugga ardayda oo xilliga caruurnimada ku kora fahanka afka, gaar ahaan afka hooyo.

3. Macallinka: Dhowr caqabadood ayaa ka jirta dhinaca macallinka: (i) Tan koowaad, tiro yaraanta macallinka tababar (<50%), kaas oo laf-dhabar u ah kobcinta tayada waxbarashada. (ii) Saamiga macallinka iyo ardayga ayaa aad u badan, meelaha qaarkoodna waxa uu gaaraya 1 macallin iyo 67 arday, taasoo keenaysa in macallinku uu si wanaagsan u gudan waayo cashar gudbinta, maamulka fasalka iyo qiimeynta ardayga. (iii) Culayska shaqada ee macallinka, taas waxaa keentay macallinka oo mushahaarkiisu ku salaysan yahay xisadaha oo doonaya inuu helo xisado badan si uu helo mushahaar wanaagsan, macallinka oo labada gelinba shaqeeya, ama casharo siiya arday gaar ah. Ardayda oo tiro badan iyo macallinka oo aan waqti hayn ayaa waxa ka dhashay in aan hoos loo fiirin waxa uu fahmay ardaygu. (iv) Qaar ka mid ah macallimiinta oo dareemay heerka aqoonta maamulaha oo hosaysa ayaa si wanaagsan u gudan shaqadooda, maddaama aysan jirin isla-xisaabtan dhab ah."Cama ayaan ka bilaabay oo yatasaa'aluuna ayaan ku geeyey!"(v) Tirada gabdhaha macallimiinta oo aad u yar(13.77%), kuwaas oo qayb lixaad leh ka qaadan lahaa tarbiyada iyo tayada waxbarashada iyo in ay si toos ah ula socon karaan baahiyaha gabdhaha.(vi) Ugu dambayntii waxa aan isku dheelitirnayn, baahida macallimiinta loo qabo iyo tababarka macallimiinta. labadii sanno ee ugu dambaysay, waxaa la tababaray in ka yar 50 macallin ee dugsiyada hoose/dhexe ee shaqada ka hor(pre-service). Tusaale ahaan, sannad dugsiyeedka 2025/2026, Puntland waxay u baahan tahay in ka badan 750 macallin oo cusub oo dugsiyadda hoose/dhexe ka shaqo gala. Arrintani waxa ay soo baxdaa marka wax lagu dhiso saamiga macallinka iyo tirada ardaya(Teacher demand= enrollment/teacher-students ratio). Haddii uusan jirin macallin tababaran, waxaa booskaas buuxinaya mid wax qora. (Meel aar fadhiyi jiray, atoor fariisay).

4. Qabyaalada: Qabyaalada ayaa waxbarashada waayadan dambe ku yeelatay raad taban. (i) Waxa jira deegaano ay wada degan yihiin labo beelood/jilib ama ka badan, kuwaas oo qolo kasta ay dugsi furteen. Tuulo ay tirada ardayda dugsiga sare ka yar yihiin 150 arday ayaa leh labo dugsi sare. Arrintaas waxa ay keenaysaa dhaqaale burbur, kala qobqobnaan iyo dhibaatooyin kale. Sidoo kale magaalooyinka qaarkood waxa ka furan tirada dugsiyada loo baahnaa ka badan. Tuusaale ahaan, ardayda dhigta hal dugsi sare ayaa ka badan 7 dugsi sare oo hal magaalo ku yaal. Maxay tahay sababtu? Taas waxaa keentay qabyaalada iyo furitaanka dugsiga oo aan loo marin hab-qorshaynta (school mapping). (ii) Meelaha qaarkood, dugsiyada caamka ah(Public school), reerka uu ka dhashay maamulaha dugsiga ayaan ogolayn in dugsiga cid kale maamusho, taas oo caqabda ku noqota habsocodka dugsiga. (iii) Hardanka tirada ardayda ayaa keenayn in dadka dugsiyada ka shaqeeya qaarkood, ay si qabyaalad ku raadiyaan ardayda.

5. uritaanka dugsiyada: Furintaanka dugsiyada hoose ayaa noqday jaantaa rogan. Goobo badan oo dugsi Quraan ahaa ayaa isku rogay dugsiyo hoose, iyaga oo xiiriir la samaystay dugsiya kale, si ay ardayda ugu soo gudbiyaan, sannad ama labo ka dib. Arrintaas waxa ay keentay in dugsiyada waaweyn qaarkood ay ku bixiyaan dhaqaale iyo qalqaale kale. Sidoo kale waxa ay arrintani keenaysaa in ardaygu uusan baran wixii loogu talo galay inuu barto. Waxaa dhacda in maamulka dugsigu uusan abidkiis dugsi Quraan ka badan uusan dhigan. Arrintaas waxa ay ka jirtaa magaalooyinka waaweyn." Dugsiyadani ma aha kuwa loo yaqaan Dugsiyada Isku-dhafan (Integrated School).

6. Waqtiga Wax la barto: Sida badan waxa dugsiyada wax lagu bartaa 4 saac oo keliya. Haddana inta badan waxa dhacda in ay ardaydu aad u daahan. Dugsiyada hoose, inta badan waxa qorshaysan in

wax la baro 3 saac, hase yeeshee waxaa wax la bartaa in ka yar 3 saacadood. Arritani waxa ay keentay in xilli kooban ardayda loo dhigo casharo badan oo ku qoran af aysan si wanaagsan u fahmayn.

7. Niyad-jabka ardayda: Waxaa muuqata in uu jiro niyad jab iyo jaah wareer haysta ardayda. Sidoo kale, waxa jira xiiso la'aan iyo dadaaal yaraan. Cilmi-baarista qaarkood waxa ay sheegayaan inay jiraan niyad-jab haysta ardayga, gaar ahaan, kuwa ka soo jeeda qoysaska nugul iyo kuwo soo barakacay. Waxaa kale oo jirta raad ay isticmaalka aaladaha baraha bulshadu ku yeesheen ardayda, taas oo keentay xiiso la'aan iyo niyad jab.

8. Dhaqaalaha: Arrinta dhaqaalaha waxa ay mid ah caqabadaha ugu waaweyn, taas oo keetay dhibaatooyin badan.(i) In ay culays ku noqoto arday badan in ay iska bixin waayeen lacagta dugsiga.(ii) Macallimiinta oo inta badan ka cabata mushahaarka. (iii) Maamulka dugsiga oo ay soo foodsaaraan culays dhaqaale, ka dib markii ay kala bateen waxa ka soo xarooda dugsiga iyo mushahaarka shaqaalaha.(iv) Dugsiga oo aan dabooli karin baahiyaha loo qabo agabka waxbarashada, sida in dugsigu yeesho shaybaar(Laboratory) iyo helitaanka aqabka waxbaritsta. Dhinaca kale, waxa kaalin mug leh ka qaata waxbarashada mashaariicda ay fuliyaan hay'adaha bah-wadaagta la ah wasaarada waxbarashada oo hadda hoos u dhac aad u weyn ku yimi. Taas oo ay keentay arrimo ay kamid yihiin deeqihii Soomaaliya la siin jiray oo yaraaday iyo is fahan la'aan u dhexaysa Dowada Federaalka Soomaaliya iyo Puntland. Arrintaas si taban ayay raad ugu yeelatay waxbarashada Puntland, gaar ahaan dhinacda dhismaha, tababarada, kormeerka iyo dhinacyo kale.

## SIDOO LOO XALIN KARAA?

Caqabadaha kor lagu soo sheegay iyo kuwo kale waxa ay u baahan yihiin in la maareeyo, si loo helo waxbarasho tayo leh oo la wada heli karo. Xalka ugu horeeya in si buuxda loo dhaqan geliyo siyaasadaha, sharciyada iyo hab-raacyada waxbarashada. Sidoo kale, waa in ay wasaaradda waxbarashadu hesho miisaaniyad ku filan iyo qoondada mashaariicda waxbarashada ay ku leedahay Puntland. Labadii sanno ee ugu dambeeyey, wasaaradda waxbarashadu waxa ay qaaday saddex tilaabo oo wax ka taraya tayada waxbarashada, sida raad-raaca ardayda u fariisanaysa imtixaanka fasalka afraad ee dugsiga sare oo la hubinayo, in ay ugu yaraan afar sanno ka soo wareegtay markii uu dhameeyey dugsiga dhexe, taas oo keentay in arday badan loo diiday in ay galaan imtixaanka fasalka afraad. Joojinta furitaanka dugsiyada sare iyo dhibcaha lagu baaso imtixaanka naqliga ah oo kor loo qaaday. Taasi waxaa ay sababaysaa in dugsiyda sare, gaar ahaan fasalada saddexaad laga qaado imtixaan qiimeyn kara tayada ardayga oo uusan arday kasta u gudbin fasalka afraad. Dhinaca afka waxbarashada waxa loo baahan yahay in la sameeyo siyaasad cad oo ku saabsan afka waxbarashada dugsiyada hoose/dhexe iyo istirajiyadii lagu hirgelin lahaa. Tusaale, aan dalka Ruwaanda, waxa ay u guurtay sannadkii 2007 in dugsiyada dhexe iyo sare wax laga barto afka Ingiriiska, iyagoo qorsheeyey mashruuc balaaran oo macallimiinta dugsiyada lagu barayo af Ingiriisiga, waxa ay ka gaareen guul la taaban karo. Waxaa la sheegaa in ay hagtay ka mid noqoshada Ururka Bulshada Afrika (oo afka Ingiriisiga looga hadlo) iyo dadka hogaanka u haya Ruwaanda oo ah dad wax ku bartay afka Ingiriisiga, si ay u riixaan siyaasiyiinta kale ee Faransiiska iyo Burtiqiiska waxa ku bartay.

Dhinaca macallimiinta, waxaa loo baahan yahay horumarinta iyo fulinta siyaasadda macallinka, dhinca shaqaalaysiinta, xaquuqta, sacadaha shaqada, dalacaada, gunnada, tababarka iyo jaangoonta inta xiso ee uu ugu badnaan bixinayo todobaadkii. In furitaanka dugsiga lagu saleeyo baahida jirta iyo sharuucaha dugsiga loo baahan yahay. Sidoo kale in is fahan iyo isku xirnaan laga dhex abuuro beelaha wada degan tuulo ama degmo, si ay u wadaagaan goobaha adeeyada bixiya (sharing resources). Jaangoonya xiliyada iyo saacada waxbarashada oo la qorsheeyo. Ardayda oo loo sameeyo barnaamijyo dhiiri-gelinta iyo niyad dhiska, si loo tirtiro niyad-jabka iyo dadaal la'aanta, loona abuuro dadaal shaqsiyeed iyo waxbarasho joogto ah. Manhajka ayaa u baahan in uu noqdo mid casri ah weliba, mahhajka kartida ku salaysan (Comptence-baseed curriculum), kaasoo oo dhiirigelinya macallinka iyo ardayda. Xilliga hadda ayaa ku haboon in dib-u-eegis lagu sameeyo manhajka, maadaama, la dhigayey muddo afar sanno ah, marka lagu daro sannadkan.


## GUNAANAD

Waxbarashadu waa furaha horumarka, kaas oo ka soo bilowday dhalashada, socdana inta uu qofku noolyahay. Waa arrin muuqata in hawl badan laga qabtay waxbarashada Puntland, hase yeeshee waxaa weli jira caqabado hortaagan waxbarashada sida tayada oo ka hooseysa heerkii la rabay iyo tirada ardayda dugsiyada aasaasiga ah oo aad u yar. Sida la soo sheegay, arrintaas waxaa loo tiirinayaa in ay keeneen caqabado badan oo is biirsaday, kuwaas oo qaarkood lagu soo sheegay qoraalkan. Sidoo kale waxaa la soo jeediyey xalal lagu maarayn karo caqabadaha jira. Haddaba waa arrin lama huraan ah in wax laga qabto dhammaan caqabadaha haysta waxbarashada, si caqabaha jira aysan u ragaadin horusocodka waxbarashada Puntland.

**WQ:** Cabdiraxmaan Shiikhdon

Sheikhdon4@yahoo.com

# DOWLADDA IYO BULSHADA: MAS'UULIYAD WADAAG IYO MILICSI QARAN



Dr. Maxamed Cali Faarax



**Xigashada Sawirka**: Villa Somalia

# HORDHAC

Dowladnimada casriga ah waxay ku dhisan tahay heshiis bulsho (social contract), taas oo qeexaysa in ay jirto is-afgarad iyo is-aaminid u dhexeysa labada dhinac ee dowladnimada: dowladda iyo bulshada. Heshiiskan waxaa astaynaya dastuurka, kaasoo qeexaaya qaabka dowladnimo ee lagu dhaqmayo, xudduudda awoodaha, iyo xuquuqaha iyo waajibaadka dhinacyada kala duwani yeelanayaan. Heshiiskaasi waa inuu noqdaa mid raalli laysaga yahay, lagu wada qanacsan yahay, lana wada ilaaliyo.

Reer Galbeedku waxay sheegtaan in dowladnimada casriga ah ay salka ku hayso kana soo bilaabmatay heshiisyadii siyaasadeed ee laga gaaray dagaalladii Yurub, gaar ahaan heshiiskii Westphalia ee 1648-dii, kaasoo dhidibada u taagay mabda'a madax-bannaanida qaranimada.

Si kastaba ha ahaatee, waxaa xaqiiqo ah oo aan la illoobi karin in Nebi Muxammad (SCW) uu horey u dhisay dowlad Islaami ah markii uu yimid magaalada Al-Madiina al-munawara, halkaas oo uu ku saxiixay heshiis bulsho dhexmaray Muslimiinta, Yuhuudda, iyo qabiilladii kale ee magaalada degganaa, islamarkaana uu soo bandhigay dastuurkii ugu horreeyay ee Islaamka—Saxiixii Madiina (Mithaaq Al-Madina) (Watt, 1956).

Xilligan aan ku jirno, dib u milicsiga taariikhda Puntland iyo aasaaskeedii 1998 ayaa igu dhalisay in aan maqaalkaan qoro. Sanadkan 2025, Puntland waxay u dabaal-degtay sanad-guuradii 27-aad ee aasaaskeeda, balse waxa uu dabaal-degani ku soo beegmay waqti ay jirto kala qaybsanaan siyaasadeed, khilaafyo deegaaneed, iyo maamullo cusub oo laga yagleelay gobollo ka mid ahaa dhulka Puntland. Maamulka cusub ee laga dhisay Waqooyiga Bari (Laascaanood) dhammaadkii bisha Agoosto 2025, wuxuu tusaale u yahay xaaladda cakiran ee soo wajahday Dowladda Puntland; waxaa haddaba loo baahan yahay talo midaysan in lagu abbaaro xaaladaha sidaan oo kale ah.

Waxaa intaas dheer duruufo nololeed oo adag oo Puntland ay maanta wajahayso oo ay kamidyihiin dhaqaale xumo baahsan, shaqo la'aan, adeeg la'aan, iyo dad badan oo dalka ka hayaamay. Halbeegyada ay tahay in Puntland ku gaarto horumar muuqda ayaa u muuqda kuwo taagan ama dib u dhacay. Waxaa la filayay in Puntland 27 sano kadib noqoto dowlad shaqeysa oo hay'adaha dastuuriga ah ay qabtaan waajibaadkooda, balse nasiib darro, waxaa soo baxay nidaam taag-daran oo u muuqda inuu laalaado hadba cidda haysa taladuna ay keligeed manaafacaadsato.

# A. DOWLADDA MAXAY BULSHADA UGU TOORRAN TAHAY?

**1. Ilaalinta sharciga iyo sarreynta dastuurka**

Dowladda waxaa laga rabaa inay ilaaliso dastuurka iyo sharciga dalka, iyada oo bulshada ku ilaalinaysa xukun daah-furan oo caddaalad ku saleysan. Qof walba, hadday tahay madaxweyne ama muwaaddin caadi ah, waa inuu hoos yimaadaa sharciga; sida uu yiri James Madison, aabbaha dastuurka Maraykanka:

""Dowladda waxaa loo aasaasaa si ay dadka ugu ilaaliso xukun ku saleysan sharciga, iyaduna waa in ay u hoggaansantaa sharcigaas."

(Madison, Federalist Papers, 1788)

Sarraynta sharciga waxaa lafdhabar u ah laba arrimood:

1. In dowlad iyo shacabba ay aaminsan yihiin in sharcigu sarraynta leeyahay, uuna ka sarreeyo cid walba darajaday doonto ha sidatee (Madaxweyne, Ra'iisul Wasaare, Guddoomiye Baarlmaan, Wasiirro iyo Madaxda Garsoorkaba); taasi waxay fududaynaysaa in sharciga laysku xukumo (Rule of Law).
2. In dowlad iyo shacabba sharciga loo siman yahay, waana waxa lagu magacaabo "المساواة أمام القانون", iyadoo aysan jirayn cid si gaar ah sharcigu ugu eexdo, ama uusan qabanayn.

Waxaa muhiim ah in la xasuusto in dhaqanka siyaasadeed ee Soomaaliya uu saameyn xun ku yeeshay laba arrimood:

- Xukunkii kelitaliska ahaa ee xilligii Maxamed Siyaad Barre
- Fowdadii ka dhalatay burburkii dowladda dhexe 1991-dii

Labadaas arrimood waxay sababeen in fahamka dowladnimo ee bulshada iyo hoggaankuba uu noqdo mid ku saleysan eex, qabyaalad, iyo ku takrifal awoodeed.

**2. Bixinta Adeegyada Bulshada**

Dowladda waxaa laga rabaa inay bulshada siiso adeegyada aasaasiga ah sida:

- Amniga: Dowladdu waa inay sugtaa amniga muwaadinka; naftiisa, maalkiisa, iyo hoygiisaba; sidoo kale waa inay awood buuxda u leedahay ilaalinta qarannimada iyo difaaca xuduudaha dalka.

- Waxbarashada: Waa adeeg asaasi ah oo dowladda laga rabo inay bulshada u fidiso, waana sida keliya ee ay bulashadu horumar iyo hal-abuur ku gaari karto, nolol wanaagsan oo ay ku naallootana ku higsan karto; gaar ahaan waxbarashada asaasiga ah in bulshada loo fududeeyo inay ku helaan lacag la'aan, taasoo culayska ka fududaynaysa qoysas badan oo dan yar oo aan awoodin inay iska bixiyaan lacagta waxbarashada.
- Caafimaadka: Waa adeeg aan bulshadu ka maarmin, waxaan lawada soconnaa dhibaatada bulshada Soomaaliyeed ku habsatay; iyadoo qofka u baahda adeeg caafimaad oo wax ku ool ah uusan dalkiisa ka helayn, taasoo ku khasabtay dadka Soomaaliyeed inay dibadaha miciin bidaan, goobaha caafimaadka ee Afrika, Carabta iyo Hinidiya ay hor tubnaadaan.
- Biyaha iyo korontada: Waa adeegyada noloshu ku xirantahay oo dowladda masuuliyaddu ka saaran tahay inay dadkeeda u fidiso ama haku siiso lacag la'aan ama ha kabto hay'adaha adeegyadaas bixiya, si loo gaarsiiyo dadweynaha adeeg jaban oo ay ka bixi karaan.
- Shaqo abuur: Iyadoo la sheego in dadka Soomaalida uu yahay dad dhallinyaro u badan oo 70% ka badan ay da'doodu 30 jir ka hoosayso, waxaa muuqata inay aad u hoosayso fursadaha shaqo abuurku, taasoo ku bixisay dhallinyaro badan inay dalkooda ka rajo dhigaan, una tabaabushaystaan sidii dalka uga bixi lahaayeen, qaarkood miciin bideen in ay maraan saxaraha iyo badda Mediterranean-ka ee halista badan si ay Yurub u gaaraan, qaar kalena dalalka Afrika nolol ka doonteen.
- Kaabayaasha dhaqaalaha: Waa adeeg fududeeya isu-socodka bulshada iyo ganacsiga, soo jiitana maalgashiga dibadda.

Dowladda aan gaarsiinin adeegyadaas bulshada waa dowlad aan buuxin waajibaadkeedii aasaasiga ahaa, waana astaan muujinaysa fashil iyo karti xumo.

**3. Ka shaqeynta danta guud iyo ka fogaanshaha ku takrifalka awoodda**

Dowladda iyo masuuliyiinta xilka haya waa in ay dareemaan in ay yihiin adeegayaal dadweyne (public servants). Haddii masuulku ku fekerayo dan gaar ah, booskiisii ayaa qaldan. Haddii aan la iskala-xisaabtamin musuq, eex iyo xil-gudasho la'aan baa salka la dhiganayaa.

## B. BULSHADA MAXAA LAGA RABAA?

**1. Wacyi iyo aqoon siyaasadeed**

Bulshadu waa in ay garataa xuquuqdeeda dastuuriga ah. Xaq aan la garanayn waa mid lumay. Waa in ay si wacyi leh u sheegataa wax kasta oo ka maqan, iyadoo adeegsanaysa codkeeda, su'aalaha sharciga ah, iyo kacdoon nabadeed.

**2. La xisaabtanka dowladda**

Bulshadu waa inay si joogto ah ula xisaabtanto hay'adaha dowladda iyo masuuliyiinta metelaya. Waxaa muhiim ah si loo gaaro isla-xisaabtan dhab ah oo saamayn yeesha in dadku fahmaan sharciga, baahiyahooda, iyo doorkooda.

**3. Gudashada waajibaadka qaranka**

Xuquuqda iyo waajibaadku waa labada garab ee muwaadinimada. Bulshadu waa inay ka shaqeyso sugidda amniga, bixinta canshuuraha, ilaalinta hantida guud, iyo ka qaybgalka horumarka dalka.

## GUNAANAD:

Ku wada noolow heshiis, ku wanaagso hawl-gudasho

Ma jirto dowlad adkaysata ama waarta haddii aan bulshadu garan xuquuqdeeda iyo waajibaadkeeda. Sidaas si la mid ah, bulsho wax raadisa ma jirto haddii aysan dowladdu lahayn karti, daacadnimo iyo daahfurnaan. Puntland 27 sano kadib waxay u baahan tahay in dib loo qiimeeyo xiriirka dowlad iyo bulsho: in la xaqiijiyo wada-jir, wacyi iyo waxqabad dhab ah.

"Heshiis bulsho waa saldhigga dowladnimo. Burburka heshiiskaasna waa burburka dawladnimada."

— John Locke (1689)

Allaa Mahad Leh.

**W/Q:** Dr. Maxamed Cali Faarax

Email: drmaxamed.cali.farah@gmail.com

# ARAGTIDA ISLAAMKA EE SIYAASADDA



Dr. Cabdirasaaq M Takar



**Xigashada Sawirka**: Google

Kalmadda "siyaasad" oo asalkeedu yahay Carabi (السياسة), marka loo noqdo macnaha ay kasoo jeeddo waxaa loola jeedaa: ku dadaalid iyo isku taxallujin in wax la hagaajiyo. Waxaa laga weriyay Nabi Muxammad (NNKH) inuu yiri:

"كانت بنو إسرائيل تسوسهم الأنبياء، كلما هلك نبي خلفه نبي"

Reer Banii Israa'iil waxay ahaayeen kuwo ay siyaasadeeyaan (ay hagaajiyaan oo maamulaan arrinkooda) Nabiyadii Eebbe, markuu Nabi dhintana Nabi kale ayaa beddeli jiray.

Siyaasaddu waa lafdhabar ama halbawle muhiim ah oo kamid ah caqiidada Muslimka. Culumada Islaamkuna marnaba kama doodin xiriirka ka dhexeeya Islaamka iyo siyaasadda, waxa keliya ee ay ka hadli jireen ayaa ahaa: Maxaa siyaasad la aqbali karo oo maslaxad ummadda ugu jirto oo aan shareecadda khilaafsanayn, iyo maxaa siyaasad aan la aqbali karin ah.

Marka aad akhriso taariikhda iyo kutubta culumada Islaamku ka qoreen siyaasadda, waxaad arkaysaa inay siyaasadda labo u kala qaadi jireen. Sida uu yiri taariikh-yahankii caanka ahaa ee la oran jiray Al-Maqrizi, Siyaasaddu waa labo nooc:

(سياسة عادلة تخرج الحق من الظالم, فهي من الاحكام الشرعية علمها من علمها وجهلها من جهلها. والنوع الاخر: سياسة ظالمة فالشريعة تحرمها).

Siyaasad caddaalad ku dhisan waa mid dulmiilaha dawgiisa marsiisa, taasina waxay ka mid tahay xukunka shareecadda, inkastoo dadka qaar ka dhaga la'yihiin. Nooca kalena waa siyaasad dulmi ah, waana midda xaqsoorka Islaamku reebayo.

Culumada fiqhiga Islaamku marka ay qeexayeen siyaasadda macnaheeda guud waxay yiraahdeen:

"فعل شيء من الحاكم لمصلحة يراها وإن لم يرد به دليل جزئي."

Siyaasaddu waa in xaakimku (madaxweyne, boqor, ra'iisul-wasaare, iwm) uu sameeyo wixii maslaxad ah ee uu arko, xitaa haddii uusan jirin daliil gaar ah oo Qur'aan ama Xadiis ah oo arrintaas ah.

Hadalkaas waxaa laga fahmayaa in siyaasaddu, marka laga eego aragtida Islaamka, ay ku qotonto ilaalinta iyo hagaajinta maslaxadda/ danta ummadda, iyada oo aysan shardi ahayn in maslaxaddaas daliil gaar ah oo Qur'aan ama Xadiis ah loo helo.

Wixii maslaxad ama dan ummadda ugu jirto waxaa sheegaya dadka ku habboon ee loo yaqaan Ahlul-Xalli wal-Caqdi – kuwaas oo talada ummaddu ka guntanto ama ka go'do.

Caalimka weyn ee la yiraahdo Ibnu Caqiil waxa uu yiri:

"السياسة ما كان فعلاً يكون معه الناس أقرب إلى الصلاح وأبعد عن الفساد، وإن لم يضعه الرسول ﷺ ولا نزل به وحي. ومن قال: لا سياسة إلا بما نطق به الشرع فقد غلط على الصحابة، فقد جرى من الخلفاء الراشدين ما لا يجهله عالم بالسنن، وكفى تحريق علي للزنادقة، وتحريق عثمان للمصاحف، ونفي عمر نضر بن الحجاج."

"Siyaasaddu waa fal kasta oo dadka ka dhiga kuwo u dhow wanaag, kana fog xumaan, xitaa haddii uusan Rasuulku ﷺ dejin ama uusan ku soo degin waxyi. Ruuxii yiraahda: Siyaasad ma jirto aan ka ahayn waxa shareecadu si cad u sheegtay, wuxuu u gefay saxaabada. Waayo, waxaa dhacay arrimo badan oo Khulafadii Raashidiintu sameeyeen oo aan cidna ka qarsoonayn. Waxaa ku filan tusaale: Cali oo gubay zanaadiqada (mulxidiinta), Cusmaan oo gubay masaaxiftii la isku khilaafay, iyo Cumar oo masaafuriyay Nadr bin al-Xajjaaj."

Hadalka Ibnu Caqiil waxa uu dhaleecaynayaa kuwa ku koobay siyaasada Islaamiga ah ama u shardiyay nas (Qur'aan ama Xadiith) tilaabo kasta oo siyaasiga Muslimka ahi uu qaadayo. Ibnu Caqiil waxa uu cadeeyay in aragtidaasi ay khilaafsantahay fahamkii Saxaabadu ay siyaasada ka qabeen, waxuuna hoosta ka xariiqay in Saxaabadu ay hirgaliyeen arimo badan oo si gooni ah uusan daliil ugu soo aroorin, waxa keliya ee ay fiirinayeen waxa uu ahaa:

"تحقيق المصالح الراجحة وإلغاء المفاسد المتوقعة"

Taas oo macnaheedu yahay: Hirgelinta wax kasta oo maslaxadiisu la hubo, iyo joojinta wax kasta oo fasaadkiisa ama dhibaatadiisa la filayo oo aan ummadda dan adduun iyo mid aakhiro ugu jirin.

Ibnu Caqiil waxa uu tusaale u soo qaatay saddex arrimood oo dhacay xilligii Khulafaa' al-Raashidiin. (Khulafaa' al-Raashidiin waxay ahaayeen raggii Saxaabada ugu waaweynaa ee Nabigu ﷺ yiri: ku dayda iyaga isla markaana ay ummadda Islaamka jidkiisii ku hoggaaminayeen).

1. Cali bin Abii Daalib waxa uu gubay koox "Sanaadiqo" ahaa (mulxidiin afka Islaam ka sheeganayay) oo yiri: Cali waa Ilaah oo caabuday Cali Eebbe weyne ka sokow. Cali waxa uu sidaa u sameeyay si uu u ilaaliyo caqiidada bulshada Muslimka ah, waxaana arrintaas ku jirtay maslaxo weyn.
2. Cusmaan bin Caffaan waxa uu gubay masaaxif Qur'aan ku qornaa oo dadku isku khilaafeen, wuxuuna bulshada ku mideeyay hal musxaf oo keliya si loo dhowro midnimada Muslimiinta iyo ilaalinta Qur'aanka.
3. Cumar bin Al-Khattaab waxa uu musaafuriyay nin la oran jiray Nadr bin Al-Xajjaaj oo quruxdiisu fitno ku noqotay dumarka, maslaxadda uu sidaas u sameeyayna waxay ahayd in bulshada laga ilaaliyo fasaad iyo in akhlaaqda mujtamaca la dhawro. (اقرب الى الصلاح وابعد عن الفساد).
4. Oo macneheedu yahay: in lagu dadaalo hirgelinta wax kasta oo maslaxad ku jirto lagana dheeraado oo laga fogaado waxii dhib u keenaya Diinta, Nafta, Maalka, Sharafta iyo akhlaaqda qofka. Siyaasiga Muslimka ahi waa inuu Diintiisa iyo Caqiidadiisa garanayo uuna fahamsanyahay marxaladda uu marayo iyo waxyaalaha lagama maarmaanka u ah.

Axkaamta Shareecadu (Islamic Law) waa labo nooc, sida Culumadu dheheen:

1. Nooc sugan oo aan is bedelin aanna lagu ijtihaadin, sida waxyaalaaha waajibka ah ee nala faray ama waxyaalaha xaaraanta ah ee nalaga reebay. Noocani waqtiga ama hadba marxalada lagu jiro midna iskuma bedelaan. (ثابت لا يتغير بتغير الزمان والمكان)
2. Nooca labaad waa Axkaam is bedesha hadba sida maslaxada ummaddu ku jirto, oo lagu ijtihaadayo iyada oo la eegayo maslaxadda, marxaladda iyo meesha hadba la joogo. Noocaas danbe waxaa laga yaabaa in Culumada Islaamka ee hadda joogaa ay khilaafaan kuwii iyaga ka horeeyay, maxaa yeelay waxaa is bedelay daruufta iyo waqtiga lagu sugan yahay ama meesha iyo makaanka la joogo.

Diinta Islaamku khasab ugama dhigin Muftiga iyo siyaasiga Muslimka ah inay ku raacaan kuwii iyaga ka horeeyay wax walba, taas bedeelkeda waxaa lagu booriyay inay tix geliyaan duruufta, marxaladda iyo meesha ay joogaan oo ay marwalba aragtidooda ku saleeyaan danta iyo maslaxadda umadda iyaga oo aan khilaafayn ummadda Diinteeda iyo caqiidadeeda, ama hadaan si kale u dhahno iyaga oo aan khilaafayn Quraanka iyo Xadiiska.

Saan hore u soo sheegnay, waxii maslaxo ku jirto waxaa sheegaya oo cadaynaya dadka la yiraahdo Ahlu al-xalli wa`al-caqdi, oo ah culumada, wax garadka iyo aqoonyahanka, waxaana habboon in ayagu ay noqdaan Baarlamaanka shacabka. Sida culumadu sheegeen masaalix aan dhab ama run ahayn ayaa jira oo dadka maangaabka ahi ay is moodsiiyaan inay maslaxo ku jirto. Culumadda Islaamka ee siyaasada wax ka qoraa way cadeeyeen arrinkaas waxayna ku tilmaameen arrinkaas: مصلحة متوهمة)) Maslaxo aan dhab ahayn.

Salka ay ku qotonto siyaasadda Islaamku waa: in la doorto waxii maslaxaddiisu ama faa'iidadiisu badantahay lana diido oo laga fogaado waxii dhibkiisu ama fasaadkiisu badan yahay. Hadii ay sinmaan maslaxadda iyo mafsadadu ama dhibka iyo faa'iidadu ama khayrka iyo sharka arini leedahay, culumadu waxa ay dheheen:

(تجنب المفسدة اولى من كسب المصلحة).


Oo macneheedu yahay: in fasaad, ama dhib iyo shar laga fogaado ayaa ka haboon in maslaxo la ahaysiiyo. Culumadda Fiqiga Islaamku aad ayay arrinkaas u faahfaahiyeen, oo waxayba ay ka hadleen hadii labo maslaxo iska hortimaaddo ama labo mafsado middood lahuri waayo oo ay khasab noqoto. Culumaddu waxa ay dheheen: haddii masaalixdu iska hortimaado tii faa'iidadeedu iyo nafcigeedu badan yahay ayaa la qaadan kuwa kalena waa la tuurin, hadii mafsado la huri waayana hadba tan dhibta yar ayaa la qaadan (اخف المفسدتين).

Waxaa laga maarmaan ah in siyaasiga Muslimka ahi uu aad uga fakaro tillaabo kasta oo uu qaadayo, uuna kala tashado dadka ehelka u ah arrintaas, sidoo kalena uu ka fekero cawaaqibka (consequences) ka dhalan kara go'aankiisa ama raadadka uu ku yeelan karo ummadda.

Nabi Muxammad ﷺ ma uusan dilin munaafiqiintii (kuwii afka Muslimka ka sheegan jiray balse uurka gaalnimada ku qarsanayay), inkasta oo cadowtinimadoodu cadayd Alle-na uu Nabiga u sheegay. Sababta Nabigu ﷺ uusan u dilin waxay ahayd inuu ka baqay fasaad ka weyn – oo ah in dadku yiraahdaan: “Muxammad wuxuu laayay asxaabtiisii.” Taasina waxay keeni lahayd in dadku Diinta Islaamka soo galin oo ay ka cararaan.

Sidoo kale siyaasadda Islaamku waxa ay diiday in xadka sharciga ah lagu fuliyo qofkii ku galay jabhadda cadowga isaga oo hortaagan, maxaa yeelay waxuu halis u yahay inuu xagooda u talaabo isaga oo ciqaabta ka baxsanaya oo uu iyaga kaalmo u noqdo. Waxaa xitaa dhici karta inuu diintiisa ka baxo, taas oo sababaysa fasaad ka weyn kii hore.

**W/Q:** Dr. Cabdirasaaq M Takar



# SAAMAYNTA TABAN EE ISTICMAALKA SHABAKADAHA BULSHADA KU LEEYIHIIN GUUSHA WAXBARASHADA ARDAYDA



Fowsiyo Cabudullaahi Cilmi



Xigashada Sawirka: Reuters

# HORDHAC

Xilligan aynu joogno oo ay kor u kacday warbaahinta dhijitaalka ah, gaar ahaana shabakadaha bulshada sida Facebook, Instagram, TikTok, Twitter (X), iyo WhatsApp ayaa qayb muhiim ah ka noqday nolosha maalinlaha ah ee bulshada gaar ahaan ardayda. Inkastoo shabakadahaan ay bixiyaan fursado isgaarsiineed iyo helitaanka macluumaadka, haddana daraasado badan oo laga sameeyey Afrika, Aasiya, Waqooyiga Ameerika, Yurub, iyo Ustaraaliya ayaa muujinaya in isticmaalka xad-dhaafka ah ee shabakadaha bulshada uu leeyahay saamayn taban oo ku aaddan waxqabadka waxbarasho ee ardayda. Saamayntan taban waxaa ka mid ah: ka leexashada waxbarashada, hoos u dhaca waqtiga waxbarashada, diiradda la'aanta ardayga ee mustaqbalkiisa, hoos u dhac ku yimaada darajooyinka, dib-u-dhac baaxad leh, hurdo la'aan, iyo hoos u dhac ku yimaada dhiirrigelinta iyo hal-abuurnimada qofeed.

Qormadan waxaan diiradda ku saarayaa saamaynta taban ee shabakadaha bulshada ku yeeshaan waxbarashada, caqabadaha iyo dhibaatooyinka ka dhalan kara, sida ay u wiiqaan tayada waxbarashada iyo hal-abuurnimada, iyo xeeladaha ay xarumaha waxbarashadu u adeegsan karaan yaraynta saamayntan. Sidoo kale, waxaan soo jeedin doonaa talooyin muhiim ah oo wax ku ool ah oo lagu xallin karo dhibaatadan.

# 1. SAAMAYNTA TABAN EE SHABAKADAHA BULSHADA EE WAXQABADKA WAXBARASHADA

### 1.1 Ka leexashada iyo diiradda oo yaraata

Daraasado badan oo la sameeyay ayaa muujinaya in ardayda isticmaasha shabakadaha bulshada in ka badan 3–4 saacadood maalin kasta ay keenaan darajooyin hoose marka loo eego kuwa isticmaala hal saac ama ka yar. Tusaale ahaan, daraasad laga sameeyay Kiinya (Otieno, 2020) waxay xustay in 67% ardayda jaamacadaha ay qirteen inay marar badan ka tagaan hawlaha waxbarashada si ay ugu mashquulaan shabakadaha bulshada. Sidoo kale, Maraykanka (Junco, 2015), waxaa lagu ogaaday in saacada dheeraadka ah ee Facebook ay sababto hoos u dhac 0.12 GPA ah.

### 1.2 Hoos u dhaca waqtiga waxbarashada

Waqtiga loogu talaggalay waxbarashada ayaa badanaa lagu lumiyaa hawlo aan waxbarasho ahayn oo khadka internetka ah. Dalka Nayjeeriya, tusaale ahaan, ardayda dugsiyada sare ayaa sheegay inay celcelis ahaan ku bixiyaan 5 saacadood maalintii shabakadaha bulshada, halka ay kaliya 2 saacadood ku bixiyaan shaqooyinka guriga (Okoye, 2018). Waqtigan oo aan ku filnayn ayaa si toos ah u wiiqa diyaar-garowga imtixaannada iyo dhammaystirka hawlaha waxbarasho.

### 1.3 Hurdo la'aan iyo saamayn xun oo waxbarasho

Isticmaalka xad-dhaafka ah ee shabakadaha bulshada habeenkii waxa uu keenaa hurdo la'aan, taas oo hoos u dhigta diiradda iyo waxbarashada. Daraasad laga sameeyay Ustaraaliya (Woods & Scott, 2016) ayaa ogaatay in ardayda habeenkii shabakadaha bulshada waqti badan ku bixiya ay 50% u badantahay inay la kulmaan hurdo la'aan maalintii iyo ka qayb-gal yar ee fasalka. Cilladahaas ayaa sidoo kale lagu arkay Soomaaliya (Abdullahi, 2021), halkaas oo ardayda jaamacadaha ay sheegeen in isticmaalka habeenkii uu sababay ka maqnaanshaha casharrada subaxdii.

### 1.4 Hoos u dhaca fikirka xog-ogaalka iyo hal-abuurnimada

Shabakadaha bulshada inta badan waxay dhiirrigeliyaan ka-qaybgal kooban oo aan mid qoto-dheer ahayn. Daraasad laga sameeyay Hindiya (Kumar, 2020) waxay muujisay in ardaydu ay ku tiirsanyihiin soo koobidda degdegga ah ee YouTube-ka halkii ay ka akhrin lahaayeen buugaag, taas oo saamaysa fahamka iyo xirfadaha falaanqaynta. Sidaas oo kale, daraasad Kanada laga sameeyay (Boyd, 2017) ayaa tilmaamtay in isticmaalka joogtada ah ee shabakadaha bulshada uu hoos u dhigo awoodda ardayda ee qorista qoraallo dheer iyo xallinta mushkiladaha.

# 2. CAWAAQIBKA SAAMAYNTA TABAN

### 2.1 Hoos u dhaca tayada waxbarashada

Marka ardaydu waqti ku filan aanay siin waxbarashada, tayada guud ee waxbarashadu ayaa hoos u dhacda. Dalka Koonfur Afrika (Moyo, 2021), macalimiintu waxay sheegeen in carqaladaha

dhijitaalka ah ay keeneen ka qaybgal la'aan ardayda, taasoo hoos u dhigaysa tayada waxbarashada.

**2.2 Hoos u dhaca darajooyinka imtixaanka iyo ka-bixitaanka waxbarashada**

Darajooyinka hooseeya iyo shaqooyinka aan dhammaystirnayn waxay keeni karaan guul-darro waxbarasho. Qiimaynta guud ee xaaladaha ardayda ayaa muujinaysa in isticmaalka xad-dhaafka ah ee shabakadaha bulshada uu kordhiyo ka-harista waxbarashada, sababtoo ah hoos u dhaca imtixaannada iyo buuxin la'aanta shaqooyinkii ardaynimo ee looga baahnaa.

## 3. SIDA SAAMAYNTU U YAREYSO TAYADA WAXBARASHADA

**3.1 Xiriirka macalinka iyo ardayga oo yaraada**

Shabakadaha bulshada waxay yareeyaan xiriirka ka dhaxeeya macalinka iyo ardayga. Macalimiintu waxay inta badan muujiyaaan in ardayda ku yaraatay ka qaybgalka fasalka, iyaga oo doorbidaya is-dhexgal online oo aan waxbarasho ahayn. Tani waxay daciifisaa is-dhexgalka iyo khibrad wadaagga arday iyo macallin ku salaysan, taasoo muhiim u ah fikirka ardayga ee si qoto dheer.

## 4. SIDA SAAMAYNTU U CURYAAMISO HAL-ABUURNIMADA IYO GANACSIGA

**4.1 Hoos u dhaca hal-abuurnimada**

Isticmaalka joogtada ah ee shabakadaha bulshada wuxuu dhiirrigeliyaa ku dayasho fikrado hore halkii laga abuuri lahaa fikrado cusub Hal-abuurnimadu waxay ku tiirsan tahay fikirka madax-bannaan, iyo xallinta mushkiladaha asalka ah.

**4.2 Waqti la'aan xirfadaha horumarinta**

Ardayda isticmaasha shabakadaha bulshada saacado badan maalintii waxay muujiyaan ka-qaybgal hooseeya hawlaha dheeraadka ah ee fasalka, tababarrada xirfadaha, iyo mashruucyada ganacsi. Tani waxay keentaa in ay ka soo baxaan iyagoo aan lahayn hal-abuurnimo, taasoo marka dambe ku adkaan karta la qabsiga iyo tartanka suuqa shaqada.

## 5. XEELADAHA XARUMAHA WAXBARASHADU AY QAADAN KARAAN

1. Saamaynta wacyigelinno joogto ah ee isticmaalka dhijitaalka
2. Qabanqaabinta tababbarro ku saabsan maaraynta waqtiga

Tababbarro ku saabsan maaraynta waqtiga waxay ka caawiyaan ardayda inay qorsheeyaan saacadaha waxbarashada iyo madadaalada, sida:

3. Xaddididda helitaanka shabakadaha bulshada.
4. Qorshaynta iska warqabka iyo kormeerka waalidiinta iyo macalimiinta ee xilliyada waxbarashada socoto.
5. Dhiirrigelinta hawlaha dheeraadka ah si loo yareeyo ku tiirsanaanta madadaalada dhijitaal-ka.
6. Ku dhiirigelinta ardayda ee u adeegsiga shabakadaha bulshada dhanka waxbarashada
7. Saamaynta siyaasado iyo shuruucyo adag oo si siman looga hirgelin dhammaan xarumaha waxbarashada

## GUNAANAD

Daraasado badan oo laga sameeyay dalal badan oo adduunka ah ayaa muujinaya in isticmaalka xad-dhaafka ah ee shabakadaha bulshada uu leeyahay saamayn taban oo joogto ah oo ku saabsan waxqabadka waxbarasho. Waxay yareeyaan diiradda, waqtiga waxbarashada, hal-abuurnimada, isla markaana kor u qaadaan dib-u-dhac, hurdo la'aan, iyo darajooyin hoose. Saamayntani maaha mid ku kooban ardayga keliya, balse waxay hoos u dhigtaa tayada waxbarashada guud iyo hal-abuurnimada ardayda iyo sidoo kale hoos u dhac guud ee ku yimaada horumarka dalalka caalamka.

**W/Q:** Fowsiyo Cabudullaahi Cilmi

# DIB-U-DHISKII NIDAAMKA CAAFIMAADKA SOOMAALIYA:

## XAALADDA HADDA, CAQABADAHA, FURSADAHA, IYO MUDNAANTA SIYAASADEED



Dr. Cabdulxamiid Sh. Ibraahim



**Xigashada Sawirka**: MSF

# HORDHAC

Xaaladda caafimaadka dalka waxay weli ku jirtaa xaalad adag. Inkastoo 25 sano laga joogo dib-u-dhiskii dowladnimadeenna – laga soo bilaabo xilligii kumeelgaarka ahaa ilaa markii si buuxda laynoo aqoonsaday – haddana hanaanka caafimaadka dalka weli si buuxda sal uma dhigan.

Inkastoo horumar laga sameeyay dhinacyo kala duwan, gaar ahaan dhimista heerka dhimashada haddana isbeddel la taaban karo lagama gaarin xaqiijinta yoolashii waaweeynaa ee caafimaadka ee caalamiga ahaa, gaar ahaan dhimista dhimashada hooyada iyo dhallaanka.

Inta badan yoolashii lagu qoray Qorshihii 1-aad ee Caafimaadka Qaranka (HSSP 2012–2016) lama gaarin, sababo badan dartood. Qormadan, waxaan ku eegi doonaa xaaladda caafimaadka dalka maanta, caqabadaha ugu waaweyn, fursadaha jira, iyo meelaha u baahan in la siiyo mudnaanta siyaasadeed si hanaanka caafimaadka dalka salka loogu dhigo, loona xaqiijiyo gaarista yoolka ugu weyn ee caafimaadka badbaadinta hooyada iyo dhallaanka Soomaaliyeed ee hadda wajahaya halista faraha badan.

# XAALKA CAAFIMAADKA DALKA

Inkastoo Soomaaliya ay samaysay horumar 25-kii sano ee lasoo dhaafay xagga yaraynta heerka dhimashada hooyada iyo dhallaanka, hadana horumarkaas kuma filnaan xaqiijinta yoolashii caafimaadka iyo halbeegyadiiba. Waxaa la qoray siyaasado, istaraatijiyado iyo qorshayaal badan, waxaa la aasaasay hay'adihii caafimaadka ee hoggaaminayay heerarka kala duwan ee dowladnimada, sidoo kale waxaa dalka iyo dibeddiisaba ka soo baxay xirfadlayaal caafimaad oo badan, halka adeegyada caafimaadka aasaasiga ahna sidii hore laga baaahiyay, inkastoo tayadoodu iyo sinnaantooduba ay wali hooseeyaan.

Dowladda Federaalka Soomaaliya, dowlad goboleedyada, iyo bahwadaagta caafimaadka waxay 13-kii sano ee la soo dhaafay sameeyeen dadaallo muuqda. Siyaasado iyo qorshayaal badan ayaa la diyaariyey, hase yeeshee badankood lama fulin oo ma aysan soo dhaafin xafiisyada. Nidaamka hay'adaha caafimaadka ee dowliga ah ayaan weli saldhigan, wuxuuna wajahaya isbarbaryaac iyo kala-daadsanaan badan. Sidoo kale, xogta caafimaadka dowladda waxay muujinaysaa in in ka badan 45% bulshada Soomaaliyeed aysan helin adeegga caafimaadka aasaasiga ah, gaar ahaan kuwa ku nool deegaannada fog iyo meelaha aysan dowladdu ka talin.

Heerka dhimashada hooyada iyo dhallaanka ayaa weli ka mid ah kuwa ugu sarreeya caalamka. Cudurro ay ahayd in hore loo xakameeyo ayaa wali si joogta ah u soo laalaabanaya, halka heerka talaalka (penta) carruurta shan sano jirka ah uu weli ka hooseeyo 60%. Ku dhawaad 1.5 milyan oo carruur ah, intooda badan ku nool magaalooyinka waaweyn, ayana weligood ma helin talaal nooca uu doono ha ahaadee.

Tirada shaqaalaha caafimaadka ayaa weli si aad ugu hooseysa dalka. Celcelis ahaan waxay ka hooseeyaan 4.5 dhakhaatiir, kalkaaliyayaal iyo umulisooyinka 10,000 qof kasta, taasoo in badan ka hooseysa halbeeggii ugu yaraa ee WHO (23/10,000) iyo heerka SDG (44.5/10,000). Arrintani waxay caqabad weyn ku tahay bixinta adeegyo caafimaad oo waxtar leh iyo gaarista yoolalka UHC iyo SDG.

Dhanka maalgelinta caafimaadka, dowladda Soomaaliya waxay caafimaadka u qoondeysaa wax ka yar 3% dakhligeeda guud, taasoo aad uga hooseysa heerarka caalamiga ah iyo kuwa Afrika. Adeeg bixinta caafimaadka ayaa si weyn ugu tiirsan jeebka shacabka iyo maalgelinta deeq-bixiyeyaasha, taasoo khatar ku helitaanka adeegyada caafimaadka ee asaasiga ah.

Dhanka kale, caafmaadka gaarka loo leeyahay ayaa noqday laf-dhabarta adeeg bixinta caafimaadka dalka meelkasta, iyadoo farmasiyo, sheybaarro, iyo cisbitaallo badan ay ka hirgaleen inta badan dalka gobolladiisa. Arrintani waxay ka caawisay bulshada helitaanka adeegyadii caafimaadka aasaasiga ahaa balse waxay sido kale abuurtay caqabado cusub oo ku saabsan in adeegyadaan gaarka loo leeyahay aysan helin nidaamintii dowladnimo ee ku addaneyd hubinta, tayeynta iyo u diyaarinta shuruucda lagu maamulo caafimaadkan gaarka loo leeyahay. Islamarkaa adeegyadaan oo ay bulshado iibsadaan ayaa horseedaya dhaqaalo xumo weyn iyo siyaadinta heerka faqriga.

# CAQABADAHA UGU WAAWEYN

Caafimaadka Soomaaliya weli waxa uu wajahaya caqabado culus oo soo jiitamayay in ka badan 25-sano, kuwaasoo saameyn ku yeeshay helitaanka adeegyada caafimaadka aasaasiga ah—taasoo laga dareemi karo tayada, helitaankooda meel kasta oo

dalka ah, iyo kalsoonida lagu qabo. Qodobada ugu waaweyn ee hortaagan horumarinta caafimaadka waa:

- Fahan yari iyo mudnaansiin la'aan horseeday lahaanshihii iyo dowladeyntii caafimaadka oo wali gaabis ah: Waxaa weli aad u hooseeya fahamka ku saabsan in helitaanka adeegga iyo aryeelka caafimaadka asaasiga ah uu yahay xuquuq dastuuri ah iyo mid bani'aadamnimo. Waxa sidoo kale maqan fahamka ah in caafimaad la'aantu ay si toos ah xariir ula leedahay amni xumada, nabad la'aan, badqabka bulshada iyo horumarka dalka dhankasta.
- Faham la'aantaasi waxay keentay in caafimaadka dalka uusan helin mudnaan siin ku filan islamarkaana u ekeysiisay mid aan la laheyn oo baylah ah. Intaa waxaa dheer, caafimaad darrida dhanka dhimirka oo ka dhalatay colaadaha mudada dheer, burburka bulshada, faqriga, abaaraha iyo barakaca ayaa sababay is-aaminaad la'aan, kalsooni darro, cabsi iyo kala shakiga bulshada dhexdeeda, gaar ahaan horumarinta dowladnimada heerarkeeda kala duwan. Waxa wali si fiican madaxda dalku aysan u fahmin in hagaajinta caafimaadka dalka aysan ahayn hagaajinta cisbitaallada iyo xarumaha caafimaadka. Fahamka ku saabsan Daryeelka Caafimaadka Asaasiga, muhiimadiisa iyo mudnaan siintiisa ayaan wali hana qaadin iyo in hannaanka caafimaadka dalka la dhiso iyadoo la adeegsanayo habka iyo hanaanka Daryeelka Caafimaadka Asaasiga ah.
- Hay'adihii Caafimaadka ee dowladda heerarkeeda kala duwan oo wali tabar daran, walina si fiican u saldhigan: Hay'addii ama xafiiskyadii caafimaadka heerar koooda kala duwan waxaa ka xoog batay shakhsiga madaxda ka ah, waxaa yar ama aan jirin isticmaalka nadaam maamul ama hoggaamineed ee hagi lahaa, toosin lahaa, xakameyn lahaa shaqo kasta oo xafiisyada ka socota, sidoo malena kala jiheyn lahaa madaxda iyo shaqaalaha xafiisyadaad. Arrinkan waxay horseeday in hay'adaha caafimaadka dowliga ah heerarkiisa kala duwan ay noqdaan kuwa taag-daran, is barbaryaac iyo kala daadsanaan badani ay dhexdooda ka jirto, islamarkaana xariirka iyo wada shaqeynta xafiisayada kala duwan ee caafimaadka dalka heerka dhexe, mid dowlad goboleed iyo gobolba uu noqdo mid daciif ah oo aan sal mug leh wali ku fadhiyin.
- Maaliyadda iyo maalgelinta caafimaadka ee ay dowladdu ku bixiso ayaa aad u hooseysa: Qoondada dhaqaale ee caafimaadka ee dowladda ayaa ka yar 3%, taasoo ka hooseysa 5 jibaar halbeegyadii maalgelinta caafimaadka ee dowladaha Africa isku raaceen 25-sano kahor. Bulshada Soomaaliyeed badankood iyaga ayaa caafimaadka jeebkooda ka iibsada kaasoo horseeday faqrinimo ba'an iyo culays aysan qaadi karin. Badi adeeg bixinta caafimaadka asaasiga ah ee dowliga ah wuxuu ku tiirsanyahay deeq bixiyeyaasha caalamiga ah oo hadda sii yaaraday, meelo badanna soo faarujiyay dhaqaale xumida adduunka ka jirta owgeed.
- Helista adeegga caafimaadka asaasiga ah: Bulshada Soomaaliyeed in ka badan 40% ma helaan adeegga iyo Daryeelka Caafimaadka Asaasiga ah. Adeegyada caafimaadka ee hadda jira ayaan weli gaarsiisneyn dalka oo dhan gaar ahaan deegaanada, tuulooyinka iyo baadiyaha fog, sidoo kalena aan lahayn tayo iyo tabar adkeysi oo ku filan.
- Cudurrada faafa iyo xaaladaha degdegga ah: Colaadaha qayb ahaan, abaaraha, barakaca iyo xaaladaha degdegga ah sida macaluusha, daacuunka, jadeecada ayaa si joogta ah u soo laalaabta sidoo kalena marar badan dib u dhigaya horumarka caafimaadka iyo dhismahan hanaankiisa. Sidoo kale, kaabayaasha nadaafadda iyo helitaanka biyaha nadiifka ah waddanka oo dhan ayaa xaaladda sii xumeynaya.

## FURSADA IYO JAANISYADA

Inkasto ay caqabaduhu yihiin kuwo waaweyn, hadana waxa jira fursado waaweyn oo horseedi kara in hanaanka caafimaadka dalka salka loo dhigo, lana xaqijiyo yoolasha caafimaadka loo dhanyahay iyo gaarista halbeegyada caafimaadka gaar ahaan yareynta heerka dhimashada hooyada iyo dhallaanka, kuwaasoo ay kamidyihiin:

- Nadaamka federaaleynta dowladnimada dalka: Nadaamkan ayaa haddii si wacan loo isticmaalo horseedi kara in bixinta adeegga caafimaadka uu baylahda ka baxo, noqdana mid hoos loo daadajiyo oo hela masuuliyad yeelata lagulana xisaabtamo.
- Qaab-dhismeedka Bulshada Soomaaliyeed: Bulshada Soomaaliyeed ayaa waxay u

dhisantahay qaab deegaan iyo qabaa'illo. Qaab dhismeedka bulshada Soomaaliyeed waa fursad weyn oo adeegga caafimaadka lagu dhisi karo. Arrinkaan waddamo badan ayaa sameeyay horumarna ka gaaray yaraynta heerka dhimashada dhallaanka iyo hooyada. Waxay u baahantahay wacyiga bulshada iyo deegaanka oo la gaarsiiyo in ay iyagu leeyihiin, maal gashtaan, ilaashadaan islamarkaana kula xisaabtamaan cidkasta oo gacanta ku haysa daryeelka iyo adeegga caafimaadka.

- Deyn cafintii dalka: Waxay abuurtay jawii ay dowladdu kula falgali karto hay'adaha caalamiga ah ee bixiya dhaqalaha, ku siyaadin karto maalgelinta caafimaadka islamarkaana ku xoojin karto tayada iyo lahaanshaha caafimaadka maadaama dhaqaaluhu marayo nidaamka maaliyadeed ee dalka.
- Teknooljiyadda iyo isticmaalka aaladaha internetka iyo dhexgalka mobilka ee bulshada: Waa fursad weyn oo aan wali laga faaiideysan oo u baahan nidaamin iyo jiheyn dowladeed iyo in lagu gaarsiiyo caafimaadka meelaha fog, tayadiisa iyo tabartiisana kor loogu qaado.
- Bahda caafimaadka gaarka loo leeyahay oo diyaarsan: Soomaaliya waxay kamidtahay dalalka ay horumarka weyn ka sameeyeen bahda caafimaadka gaarka loo leeyahay. Balse ma aysan helin dowlad nidaamisa kana faa'iideysata. Haddii la nidaamiyo bahda caafimaadka gaarka loo leeyahay, wada shaqeyn ku saleysan danta bukaanka caafimaadka dalkana lagu saleeyo waxa imaan karta in si dhaksho ah isbeddel weyn loo sameeyo dhanka xaqiijinta yoolasha caafimaadka loo dhanyahay.

## XALKA IYO SOOJEDIMO KU AADAN HAGAAJINTA XAALKA CAAFIMAADKA DALKA

Si fursadaha looga faa'iideysto, loona badbaadiyo hooyada iyo dhalllaanka sida xad dhaafka ah ugu dhimanaya dalka gudihiisa, waxaan soojeedinayaa:

- Xoojinta mudnaansiinta caafimaadka: Madaxda dalka heerarkooda kala duwan waa in ay fahmaan haddii aysan iyagu caafimaadka siin mudnaanta uu leeyahay in aysan jirin cid kale oo siineysa mudnaantaas ama ku bixineysaa dhaqaale ajnabi. Madaxdu waa in ay fulisaa balanqaadka dastuuriga ah ee ku aadan helista caafimaadka asaasiga ah, isla markaana u aragta in arrinkani yahay waajib saaran dowladda. Madaxdu waa in ay fahantaa in bulsho caafimaad qabta oo keliya ay dalkeeda horumarin karto dhankasta, islamarkaana hagaajinta iyo helista daryeelka caafimaadku uu si toos ah uga qayb qaadanayo hagaajinta aminga iyo xaslininta Dalka.
- Dhismaha hay'adaha caafimaadka dowliga ah iyo hanaankii caafimaadka dalka: Waa in sidoo kale mudnaan ku filan la siiyaa dhismaha hay'adaha caafimaadka dalka si ay u noqdaan kuwa bixin kara adeegyada bulshadu u baahantahay. Dhismaha hay'adaha dowliga ah iyo hannaanka caafimaadka dalka waa in lagu saleeyaa oo loo maraa habka iyo hanaanka Daryeelka Caafimaadka Asaasiga ah. Wa in hay'aduhu ay ka weynaadan shakhsiyaadka hoggaaminaya islamarkaana madaxda kala duwan ee hay'adaha caafimaadka lagu xulaa karti, xirfad iyo aqoon ee aan lagu saleyn habka 4.5 ee siyaasadda iyo waxa lamidka ah. Madaxdu waa in ay iyagu tusaale iyo hormuud u noqdaan hagaajinta caafimaadka dalka iyo gaar ahaan yagleelidda yoolka caafimaadka loo dhanyahay iyo Daryeelka Caafimaadka Asaasiga ahba.
- Nadaaminta adeeg bixinta caafimaadka: Waa in laga guuraa qaabka adeeg bixintii hore ee caafimaadka asaasiga ahaa ee ku salaysnayd xarunta caafimaad oo loo guuraa hanaanka daryeelka cafimaadka asaasiga ah ee xoogga saaray Bulshada dhexdeeda iyo kan xarumaha oo isku xiran. Waa in Daryeelka Caafimaadka Asaasiga ah uu noqdaa habka rasmiga ah ee loo marayo dhismaha hannaanka caafimaadka dalka iyo sidoo kale bixinta adeegyada caafimaadka ee asaasiga ah.
- Xalka maalgelinta caafimaadka dalka: Dowladdu waa in ay eegtaa wadamada dibada iyo hababka la soo tijaabiyay ee

lagu xalliyo dhibbaatada maalgelinta caafimaadka dalkeena. Dowladda iyo bahwadaagteedu waa in ay hirgeliyaan maalgelinta caafimaadka ee ku dhisan caymiska bulshada kasoo si wacan loo waafajin karo qaab dhismeedka bulshada Soomaaliyeed iyo deegaannadooda. Waa in si dhakhso ah looga guuraa caafimaadka ku xiran deeq-bixiye iyo kan gaarka loo leeyahay o keliya.

- Hagaajinta caafimaadka gaarka loo leeyahay iyo hirgelinta barnaamijka isku dhafan ee dowladda, bulshada iyo bahda caafimaadka gaar ka ah: Dowladdu waa in ay si dhakhso ah u dejiso una hirgeliso dhammaan nidaamyadii, shuruucdii iyo habraacyadii lagu maarayn lahaa caafimaadka gaar ka loo leeyahay islamarkaana hirgelisaa nadaamka isku dhafan ee ay ku wada shaqayn karaan dowladda, bulshada iyo caafimaadka gaarka loo leeyahay.

## GUNAANAD

Xaalka caafimaadka Soomaaliya wuxuu taagan yahay isgoys. Wuxuu u baahanyahay faham iyo mudnaansiin ka badan inta hadda jirta. Madaxdu waa in ay fahantaa in helista adeegga caafimaadka asaasiga ah uu yahay xuquuq dastuuri ah iyo mid bani'aadamnimo, waana in qof kasta oo Soomaali ah, meel kasta oo uu joogo, uu helaa daryeel iyo adeegga caafimaad asaasiga ah oo tayo leh.

Waxaa sidoo kale muhiim ah in la fahmo in caafimaad darrida ay saamayn toos ah ku leedahay sugidda nabadda iyo xasillinta dalka. Waxa loo baahanyahay hoggaamin isbeddel oo dhammaystiran (transformative leadership) oo horseedi karta isbeddel dhab ah, gaar ahaan yagleelidda hay'adaha iyo hannaanka caafimaadka dalka, dib u qaabeynta hannaanka caafimaadka iyo waafajinta Hannaanka Daryeelka Caafimaadka Asaasiga(PHC approach), maareynta xaaladda cakiran ee maalgelinta caafimaadka iyo diyaarinta qaabab cusub ee kobcinta dhaqaalaha caafimaadka ee gudaha.

Sidoo kale, waa in la heli habab iyo qaabab cusub oo ka duwan kuwii hore oo lagu bixinayo laguna baahinayo adeegga caafimaadka asaasiga ah sida qaabka ku dhisan wadashaqeynta bulshada, dowladda iyo caafimaadka gaarka ah, kuwaas oo ku salaysan shuruuc cad, nidaam hubinaya tayada, isla markaana ilaalinaya bukaanka taagta daran.

## XIGASHO


- Federal Ministry of Health, Somalia (2022). Health Sector Strategic Plan III .
- WHO (2023). Somalia Country Cooperation Strategy..
- World Bank (2022). Somalia Health Sector Public Expenditure Review.
- African Development Bank (2023). Somalia Debt Relief and Financing Outlook.





**Xigashada Sawirka**: MSF

# ISBEDDELLADA JUQURAAFI- SIYAASADEED EE GOBOLKA IYO SAAMAYNTEEDA SOOMAALIYA!



Dr. Cabdifitaax Nuur Axmed (Ashkir)




**Xigashada Sawirka**: Nationalia

Cilmiga-juquraafi siyaasadeed (Geopolitics) waa cilmiga markii la soo koobo daraasadeeya awoodda siyaasadeed ee xayndaabka juquraafi oo ay dowlladi leedahay.

Si aan u fahanno hardanka maanta dunida ka jira waa in aynu akhrin karnaa sooyaalkii tagay, waa maxay sababaha dhabta ah ee dunidu u dagaalamayso.

Iyada oo aan ilaalinayno baaxadda la oggolyahay inuu qoraalkani xayndaabkiisu ahaado, ayaynu si dul mara u sharaxaynaa aragtiyada gundhigga u ah cilmiga juquraafi siyaasadeedka.

1- " (Heartland Theory" waa aragtida qalbiga dhulka, waxaa aragtidaas horumariyay aqoonyahankii u dhashay dalka Ingiriiska ee lagu magacaabi jiray Halford Mackinder wuxuuna ula jeeday ruuxi wadnaha dhulka haystaa wuxuu gacanta ku hayaa dunida oo idil.

2- "World-Island Theory" aragtidaan waxay dhamaystir u tahay aragtidii hore ee "Mackinder" waxay tibaaxaysaa aragtidan awooddii qabsataa "Eurasia" waxay haysataa dunida oo idil, waa Europe iyo Asia oo laysku daray ayaa loo soo gaabiyay "Eurasia" waa jasiiraddii caalamka.

3- "Sea Power Theory" waa aragti uu curiyay caalimkii juquraafi-siyaasadeed Maraykanka ee lagu magacaabi jiray "Alfred Thayer Mahan" aragtidaan waxay soo ifbaxday qarnigii 19-Aad, waxay oranaysaa: awooddii qabsataa marinnada biyaha ee adduunku iyadaa ku gacan sarraynaysa hoggaanka dunida.

4- "Rimland Theory" waa aragti uu curiyay caalim dalka Ameerika ka soo jeedaa (Nicholas J. Spykman) aragtidiisu waxay ku qotontaa awoodaha ku teedsan xeebaha ayaa leh furaha xukun ee nidaamka awood qaybsiga dunida.

5- "Great Power Theory" waa aragti tibaaxaysa dunidaan ciddii awood lihi iyadaa ayaa majaraha siyaasadeed u haysa, tahayna in loo daba fariisto haggida halka loo jihaysanayo.

Juquraafi-siyaasadeedka dunida wuxuu guud ahaan u qaybsanyahay awoodaha badda iyo kuwa barriga, awoodaha badda oo ay calanka u sidaan reer Galbeedka Maraykanka, Yurub, Ustaraaliya.

Awooddaha barrigana waxaa calanka u siday waligeed Ruushka, waxaana dagaalka labada awoodood xaabo u ah dunida inteeda kale, dalalka Ruushka dariska la ihi waxay dhibbane u yihiin istiraatiijiyad juquraafi-siyaasadeed.

Waa halkii uu ka lahaa Dr. Jamaal Xamdaan (1928-1993) caalimkii dalka Masar u dhashay ee ku takhasusay Juquraafiga, wuxuu labada awoodood ee ku hardamaya dunida u kala bixiyay: awoodaha beeralayda oo uu ula jeeday kuwa badda, iyo kuwa bad-maaxda ah ee uu ula jeeday kuwa badda.

Dr. Jamaal Xamdaan aragtiyadii uu ku soo kordhiyay juquraafiyada-siyaasadeed waxaa ka mid ah: muhimmada gaarka ah ee dunida Islaamku u leeyihiin marinnada badda, oo ah awood ka dhigi karta dunida Islaamka kuwo ixtiraam iyo mudnaan gooni ah u leh dunida oo idil, go'aannadooda siyaasadeedna ka dhigi karta kuwo meel mar ah.

## SOOMAALIYA IYO KAALINTEEDA JUQURAAFI-SIYAASADEED!

Soomaaliya waxay ku taal goob istiraatiiji ah oo marinnada dunidoo dhami u muhiim ah. Waa dal dhaca qaaradda Afrika cirifkeeda u shisheeya.

Waxaa Soomaaliya dhacdaa bad-weynta Hindiya iyo gacanka Khaliijka, waxay kutaalaa halka lagu tilmaamay inay ubuc u tahay dunida oo idil.

Soomaaliya haddaan dhinaca juquraafi-siyaasadeedka ka fiirinno waxay ku jirtaa dalalka loo yaqaan "Jasiiradda Caalamka" oo ka kooban qaaradda Afrika iyo Aasiya, dhinaca kalena waxay dhacdaa halka loo yaqaan "Crash Zone" oo ah halka hardanka ugu darani ka jiro.

Hardanka dunido ku jirto waxaa mooddaa Soomaaliya hoggaankeedu inuusan ku baraarugsanayn, mana jirto akhrin hillaadin huwan, kuna hubeysan fogaal-aragnimo in lagula tacaalo arrimaha murugsan ee ku gadaaman siyaadadda Soomaaliya dhinaceeda arrimaha dibadda.

# MAXAA SOOMAALIYA LA GUDBOON?

Hardanka awoodaha soo kobcaya, raba inay baal la baxaan oo ay foolaadka u yihiin dalka "Shiinaha" iyo kuwa iminka ku haysta majaraha dunida oo ah: Maraykanka iyo xulufadiisa awoodaha baddu, waxay Soomaaliya u baahantahay inay isu dheelitirto habsami-u-socotka siyaasadeed.

Sida ay cilmi-baarisyo qoto dheer tilmaamayaan Soomaaliya waxay dhexda kaga jirtaa halgan iyo loolan mug leh, waxaa ku dul dagaalamaya awoodo aysan la socon halka ay u jihayn doonaan mustaqbalka dhow.

Sannadkii 2018 Shiinuhu wuxuu maalgeliyay filim uu u bixiyay " Hawlgalkii Badda Cas" waxaa filim-kaas maalgelisay wasaaradda gaashaandhigga Shiinaha, dhacdooyinka filim-kaas waxay ka warramayaan iska hor imaad dhex mari doonaa Shiinaha iyo Maraykanka.

Sida summadda filim-kuba sito, cidda maalgalisayna ay uga dan lahayd waa in Shiinaha loo sawiro inay noqotay awood kula hardami karta Ameerika badaha dushooda.

Markii laga yimaado ujeeddooyinka cad iyo kuwa dadban ee filim-ku, waxa aaan caad saarnayn in Soomaaliya tahay goob istiraatiiji ah, loona baahanyahay Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya (JFS) in ay la timaaddo qorshe siyaasadeed oo ay ku tibaaxayso mowqifkeeda Juquraafi-siyaasadeed.

**W/Q.** Dr. Cabdifitaax Nuur Axmed (Ashkir)
















**Website**: https://maragnews.com/

**Email**: editor@maragnews.com

MAJALADDA
MARAG